

# BAYAANKA BADQABKA ISKUULLADA

## Nidaamka Waxqabadka

Isbahaysiga Caalamiga ah

**Ee Ka Hortagga Weerarrada Ka Dhanka Ah Waxbarashada**

GCPEA

## Faahfaahin ku saabsan Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada (GCPEA)

Dukumiintigan waxaa daabacay Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada (GCPEA), kaasoo ay sanadkii 2010 asaaseen ururo ka shaqeeya waxbarashada dalalka ay ka jiraan xaaladaha degdegga ah iyo kuwa ay saameeyeen colaadaha, iyo hay'addo ka shaqeeya tacliinta sare, difaacidda xuquuqda aadanaha iyo shuruucda caalamiga ah ee bani'aadannimada, kuwaasoo ka walaacsan weerarrada ka dhanka ah xarumaha waxbarashada, ardada iyo shaqaalaha ku sugan dalkaasi. GCPEA waa isbahaysi ay xubin ka yihiin ururada kala ah: Article 36, The Council for At-Risk Academics (CARA), Geneva Call, Human Rights Watch, The Institute of International Education, Norwegian Refugee Council, The Office of the United Nations High Commissioner for Refugees (UNHCR), Protect Education in Insecurity and Conflict (PEIC, waa mashruuc ay leedahay hay'adda Education Above All), Save the Children, The Scholars at Risk Network, Studentenes og Akademikernes Internasjonale Hjelpefond (SAIH), The United Nations Children's Fund (UNICEF), The United Nations Educational, Scientific and Cultural Organization (UNESCO), iyo War Child Holland.

GCPEA waa mashruuc ay fulinayso xarunta Tides Center, oo ah urur aan faa'iido raadis ahayn (501(c)(3))oo fadhigiisu yahay Maraykanka.

Dukumiintigan waa mid ka madax bannaan hay'adaha xubinta ka ah guddiga joogta ah ee GCPEA, loomana qaadan karo mid ka turjumaya afkaarta hay'adaha xubinta ka ah guddigaasi.

## Mahadcelin

Isbahaysiga GCPEA waxa uu si weyn ugu mahadcelinayaa taageerada deeqsinimada leh ee dowladda Norway, hay'adaha PEIC, a program of Education Above All, Article 36, iyo deeq bixiye aan rabin in la shaaciyo.

# JADWALKA MOWDUUCYADA

**Hordhac** ........ **6**

**Bayaanka Badqabka Iskuullada** ........ **7**

**Nidaamka Waxqabadka** ........ **8**

**1. Ka hortagga in ciidamada ay iskuullada iyo jaamacadaha adeegsadaan xilliyada dagaalladu socdaan – Adeegsiga *Tilmaamaha ka Hortagga in Ciidamada ay Iskuullada iyo Jaamacadaha Adeegsadaan Xilliyada Dagaalladu Socdaan*** ........ **9**

Su'aalaha Hagaya iyo Talooyinka ........ 9

Tusaalooyin ........ 12

Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Congo: Amar golaha wasiiradda kasoo baxay oo lagu mamnuucay in ciidamada ay qabsadaan iskuullada ........ 12

Filibiin: Dastuurka dalka oo si cad xarumaha waxbarashada uga difaacay in loo adeegsado ujeedooyin milateri ........ 12

Colombia: In ujeedooyin milateri loo adeegsado xarumaha waxbarasho oo meel ka dhac ku ah mabda'a kala soocidda iyo taxadarka ee awaamirta ciidan ........ 12

New Zealand: Sharciga qabyada ah ee ciidamada oo si cad u difaacaya xarumaha waxbarashada ........ 12

Switzerland: Sharciga qabyada ah ee ciidamada iyo colaadaha hubaysan oo si cad u difaacaya xarumaha waxbarashada ........ 12

Denmark: Sharciga qabyada ah ee ciidamada oo si cad u difaacaya xarumaha waxbarashada ........ 13

Nepal, Sri Lanka, iyo Myanmar: In dhinacyada ku lugta leh colaadda ee heshiiska nabadeed qaatay ay joojiyaan adeegsiga xarumaha waxbarashada ........ 13

Jamhuuriyadda Bartamaha Afrika: Amar ay Qaramada Midoobay ku siisay ciidankeeda nabad ilaalinta iyo booliska inay adeegsiga milateri ka difaacaan xarumaha waxbarashada ........ 13

Jamhuuriyadda Bartamaha Afrika: Taxadarka Amarka ay Qaramada Midoobay ku siisay ciidankeeda nabad ilaalinta iyo booliska inay adeegsiga milateri ka difaacaan xarumaha waxbarashada ........ 14

Qaramada Midoobay: Daraasad xaalad oo ku aaddan tababarka difaacidda carruurta iyo u adeegsiga iskuulladda ujeedo milateri ee la siiyo nabad ilaaliyayaasha Qaramada Midoobay ........ 14

Luxembourg: Ballanqaad ah inay tilmaamaha ku dhaqangeliso sharciga iyo dhaqanka milateri ........ 14

Slovenia: Ballanqaad ah inay tilmaamaha ku dhaqangeliso tababarka milateri iyo fikradaha isbedel ku samaynta ammaanka Midowga Yurub iyo NATO ........ 14

Talyaaniga: Ballanqaad ah inuu tilmaamaha ku dhaqangeliyo sharciga gudaha iyo dhaqanka milateri ........ 15

Norway: Ilaalinta maqaamka rayidnimo ee xarumaha laba qaab loo adeegsanayo xilliyada colaadda ........ 15

Ecuador: Xurmeynta dhismayaasha jaamacadaha iyo cunaqabateynta kuwa ku xadguduba ........ 15

Macluumaad muhiim ah ........ 15

**2. Ururinta macluumaadka iyo caawinta dhibbanayaasha weerarrada loo geysto waxbarashada inta ay colaaddu jirto, sida ardada iyo shaqaalaha.........................................16**

Su'aalaha Hagaya iyo Talooyinka ....................17

Tusaalooyin ....................18

Hagidda Qaramada Midoobay ee nooca macluumaadka loo baahan yahay si loo diiwaangeliyo weerarrada loo geysto iskuullada iyo dadka lagu dhawray nidaamka Qaraarka Golaha Ammaanka ee tirsigiisu yahay 1998 (2011) ....................18

Wadashaqeynta ka dhexeysay shacabka iyo milateriga ee dusha kala socoshada xiisadaha ka dhashay waxbarashada ee colaadda Georgia/ Abkhazia ....................19

Dowrka ciidamada nabad ilaalinta Qaramada Midoobay ee dusha kala socoshada tacaddiyada waaweyn ee ka dhanka ah carruurta, gaar ahaan weerarrida iskuulllada ....................19

Macluumaad muhiim ah ....................19

**3. Xoojinta dowrka difaacidda waxbarashada ee xilliyada colaadda....................20**

Su'aalaha Hagaya iyo Talooyinka ....................20

Tusaalooyin ....................22

Midowga Afrika: Ka difaacidda waxbarashada ee weerarrada iyo tacliin colaadda la jaanqaadi karta, Istaraatijiyadda Waxbarasho ee Qaaradda Afrika 2016-2025 ....................22

Falastiin: Adeegsiga xeeladaha yareynta musiibooyinka si loo difaaco iskuullada, ardada, iyo macalliinta marinka Gaza ku wajahaya khatarta weerar....................23

Soomaaliya: Adeegsiga waxbarashada raadiyaha lagu gudbiyo ....................24

Nigeria: Waxbarasho bedel ah oo loo fidiyo carruurta ku barakacday colaadda ....................24

Nigeria: Bayaanka Agaasimaha Waxbarashada ee Wasaaradda Gaashaandhigga ee Shirka Badqabka Iskuullada ee Buenos Aires ....................24

Nepal: Wadaxaajoodka habka difaaca iskuullada ....................25

Macluumaad muhiim ah: ....................26

**4. Hormarinta iyo xoojinta taageerada siyaasadeed ee shirarka caalamiga ah ee lagu difaacayo waxbarashada xilliyada ay socdaan colaadaha. ....................27**

Su'aalaha Hagaya iyo Talooyinka ....................27

Tusaalooyin ....................29

Argentina: Martigelinta Shirka labaad ee caalamiga ah ee Badqabka Iskuullada ....................29

New Zealand: Bayaan lagu dhiiragelinayo taageeridda tilmaamaha ee Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ....................29

Malaysia: Hadal lagu shaacinayo ansixinta Bayaanka Badqabka Iskuullada ee Golaha Ammaanka ....................29

Nigeria: Hadal lagu muujinayo ansixinta Bayaanka Badqabka Iskuullada ee Golaha Ammaanka ....................30

Midowga Afrika: Baaq ah in Golaha Ammaanka iyo Nabada ee Midowga Afrika uu taageero tilmaamaha ....................30

Sierra Leone, Zambia, iyo Norway: Taageeridda aqoon-isweydaarsi heer gobol ah oo ku aaddan hirgelinta tilmaamaha ....................30

**5. Isla xisaabtan ku aaddan weerarrada lagu qaado xarumaha waxbarashada, ardada iyo shaqaalaha inta ay colaaddu jirto ....................31**

Su'aalaha Hagaya iyo Talooyinka ....................31

Tusaalooyin ....................32

Argentina: In si cad loogu xuso xarumaha waxbarashada eray bixinta dembiyada dagaalka ....................32

Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Congo: Maxkamadeynta dadka lagu eedeeyay inay geysteen weerarrada lagu qaaday xarumaha waxbarashada ....................32

Maxkamadda caalamiga ah ee qaabilsan dembiyada Yugoslavia-dii hore: Dacwad kusoo oogidda dadka lagu eedeeyay inay geysteen weerarrada lagu qaaday xarumaha waxbarashada:....................32

Guddiga Sheegashooyinka Eritrea iyo Itoobiya: Magdhaw ka bixinta weerarrada lala beegsado iskuullada ....................33

Maxkamadda caalamiga ah ee dembiyada: Aqoonsiga matalaad loo sameeyay iskuul la burburiyay oo qeyb ka ahaa kiiskii ka dhanka ahaa Thomas Lubanga....................33

Maxkamadda Xuquuqda Aadanaha ee Yurub: Xukunka kiis khuseeyay weerarkii 2004 lagu qaaday iskuul ku yaal Beslan, Ruushka....................34

Macluumaad muhiim ah ....................34

**Lifaaqyo ....................35**

Bayaanka Badqabka Iskuullada ....................35

*Tilmaamaha ka Hortagga in Ciidamada ay Iskuullada iyo Jaamacadaha Adeegsadaan Xilliyada Dagaalladu Socdaan* ....................37

# HORDHAC

Nidaamkan waxqabadka waa mid doonaya inuu usoo bandhigo dowladaha talooyin iyo tusaalooyin badan oo ka caawin kara go’aannada ku aaddan qaabka ugu wanaagsan ee ay ku fulin karaan ballanqaadyada ay sameeyeen markii ay ansixiyeen Bayaanka Badqabka Iskuullada. Waxa uu sidoo kale caawin karaa dhinacyada kale ee daneynaya sida hay’adaha caalamiga ah iyo kuwa qaranka ee ka shaqeeya qeybaha uu muhiimka u yahay Bayaanka Badqabka Iskuullada (Difaaca, waxbarashada iyo sharciga caalamiga ah) iyo kuwa ku hawlan u ololeynta meelmarinta bayaanka.

Loogama gol laha nidaamkan waxqabadka inuu noqdo liis ay ku dhan yihiin tallaabooyinka la qaadayo si loo meelmariyo Bayaanka Badqabka Iskuullada. Waxa uu garawsan yahay in ballanqaadyada kala duwan ee ku jira Bayaanka Badqabka Iskuullada ay matalaan xaqiiqooyin kala gedisan iyo fursado wax lagu samayn karo, ayadoo la eegayo xaaladda jirta, awoodda iyo dowrka dal kasta oo ansixiyay bayaanka. Sababtaas awgeed, ayaa Nidaamkan Waxqabadka waxa uu bidhaamiyaa qaabab kala duwan oo lagu samayn karo siyaasado, dhaqaalo iyo mashaariic, waxaana ku urursan tusaalooyin iyo macluumaad muhiim ah oo gacan ka geysan kara hagidda ama dhiiragelinta. Isbahaysiga GCPEA ayaa ku dhiirageliya dalalka inay tixgeliyaan dhammaan su’aalaha hagaya, talooyiinka iyo tusaalooyinka ayadoo aan loo eegeyn in ciidamadooda ay toos ugu lug leeyihiin colaadda iyo in kale.

Isbahaysiga GCPEA ayaa sii wadi doona inuu diiwaangeliyo ficillada wanaagsan ee lagu difaacayo ardada, macallimiinta iyo iskuullada ay soo wajahaan weerarrada iyo adeegsiga milateri, gaar ahaan tallaabooyinka wax ku oolka ah iyo ficillada soo bixi doonaa bilaha iyo sanadaha soo socda, ayadoo dalal badan ay billaabayaan inay meelmariyaan Bayaanka Badqabka Iskuullada iyo adeegsiga Tilmaamaha ka Hortagga in Ciidamada ay Iskuullada iyo Jaamacadaha Adeegsadaan Xilliyada Dagaalladu Socdaan (“tilmaamaha”). Tusaalooyinka cusub ee ficillada wanaagsan ayaa waxaa lagu daabici doonnaa bogga internet-ka ee isbahaysiga GCPEA.[1]

[1] http://www.protectingeducation.org





# BAYAANKA BADQABKA ISKUULLADA

Bayaanka Badqabka Iskuullada waa dukumiinti siyaasadeed oo ay dalalka ku garawsadaan caqabadaha wajaha waxbarashada xilliyada ay colaadda jirto, ayna go’aan uga gaarayaan sidii loo wanaajin lahaa difaacidda ardada, shaqaalaha iyo goobaha waxbarashada inta uu dagaalka socdo. Bayaanka ayaa lagu diyaariyay wadatashi magaalada Geneva lagula sameeyay dalalka oo ay hogaaminayeen Norway iyo Argentina, waxaana ansixintiisa lagu soo bandhigay Shirkii Badqabka Iskuullada ee Oslo, Norway ka dhacay 29-kii May 2015.

Bayaanka waxa uu qeexayaa saameynta degdega ah iyo tan mudada fog ee ay weerarrada iyo u adeegsiga ujeedooyinka milateri ee xarumaha waxbarashada ku leeyihiin ardada, macallimiinta iyo bulshada ku nool xaaladaha colaadda. Waxa uu arintaasi barbar dhigaa wanaaga iyo dowrka difaaca ah ee ay waxbarashada qaadan karto xilliyada colaadda hubaysan, asagoo muujinaya qaababka muhiimka ah iyo isku dayadda gacanta ka geysan kara in waxbarashada laga difaaco weerarrada, gaar ahaan qaraarrada khuseeya ee Golaha Ammaanka iyo nidaamka Qaramada Midoobay ee dusha kala socoshada tacaddiyada waaweyn ee ka dhanka ah carruurta. Ka dib waxa uu soo bandhigaa tiro go’aanno adag ah oo lagu difaacayo waxbarashada xilliyada colaaddu jirto sida: diiwaangelinta khasaaraha iyo burburka ay weerarrada u geysteen ardada, shaqaalaha waxbarashada iyo xarumaha; caawinta dhibbanayaasha; iyo taageeridda mashaariicda bani’aadannimo ee looga gol leeyahay in waxbarashadu sii socoto xilliyada uu dagaalka jiro. Arinta muhiimka ah waa in marka ay dalalka ku biiraan Bayaanka ay meelmariyaan adeegisa Tilmaamaha ka Hortagga in Ciidamada ay Iskuullada iyo Jaamacadaha Adeegsadaan Xilliyada Dagaalladu Socdaan.

Ayadoo la garawsan yahay in dhinacyada ku lugta leh colaadda ay wajahaan duruufo adag, ayaa Tilmaamaha waxa ay u fidinayaan hagid wax ku ool ah oo ka caawin kara inay yareen u adeegsiga ujeedooyinka milateri ee xarumaha waxbarashada iyo saamaynta ay arintaasi ku yeelan karto badqabka ardada iyo waxbarashada. Tilmaamaha oo lagu diyaariyay muddo sanado ah ayaa waxaa lagala tashaday dowladaha, xooggaga hubaysan iyo hay’adaha caalamiga ah, waxaana hannaankaasi garwadeen ka ahaa Isbahaysiga Caalamiga ah ee Ka hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada, kaasoo billaabay sanadkii 2012, soona geba-gabeeyay Disembar sanadkii 2014 asagoo ay hogaaminayaan dalalka Norway iyo Argentina. Tilmaamahan ma aha kuwo sharci ah, mana abuurayaan waajibaad sharci oo cusub oo caalami ah. Taa bedelkeeda waxa looga gol leeyahay inay si khiyaari ah u bedelaan hab-dhaqanka dadka, ayagoo bandhigaya tusaalooyin jira, si loo wanaajiyo ilaalinta maqaamka rayidnimo ee xarumaha waxbarashada, loogana difaaco weerarrada.

Bishii Mey 2017, Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, António Guterres, ayaa ugu baaqay dhammaan dalalka caalamka inay ayidaan Bayaanka Baqdabka Iskuullada, xilli uu Golaha Ammaanka u jeedinayay warbixintiisa ku aaddan difaacidda dadka rayidka ah ee ku sugan goobaha ay colaadaha ka jiraan (S/2017/414).

******

Liiskii ugu dambeeyay ee saxiixayaasha Bayaanka Badqabka Iskuullada ayaa laga heli karaa barta internet-ka ee wasaaradda arimaha dibedda ee Norway:

https://www.regjeringen.no/en/topics/foreign-affairs/development-cooperation/protecting-education-endorsed/id2460245/

Dalalku waxay xilli kasta ku dhawaaqi karaan inay taageersan yihiin Bayaanka Badqabka Iskuullada ayagoo si shaac baxsan u sheegaya inta ay socdaan shirarka ay dalalka isugu yimaadaan, ama warqad ansixin ah u diraya dowladda Norway, hadda ah tan loo gudbinayo saxiixa bayaankan, ama si toos ah ugu diraya cinwaanka Seksjon.for.humanitaere.sporsmal@mfa.no.

Ma jirto shuruud u gaar ah cidda saxiixaysa warqadda ansixinta, waxaa muhiim ah oo keliya in qofku yahay mid awood u hel inuu ballanqaad sameeyo asagoo matalaya dowladdiisa.

# NIDAAMKA WAXQABADKA

Bayaanka Badqabka Iskuullada ayaa qeexa tiro go'aanno ah oo ku aaddan shan qodob oo la dhaqangelinayo:

1. **Ka hortagga in iskuullada iyo jaamacadaha loo adeegsado ujeedooyin milateri xilliyada ay colaaddu jirto:**

   "Waxaan ansixinay Tilmaamaha ka Hortagga in Ciidamada ay Iskuullada iyo Jaamacadaha Adeegsadaan Xilliyada Dagaalladu Socdaan waana: adeegsan doonnaa tilmaamaha, annagoo sida ugu macquulsan, kuna haboon ugu darayno siyaasadaha gudaha iyo nidaamka hawlgalka."

2. **Ururinta macluumaadka iyo jawaabcelinta weerarrada ka dhanka ah xarumaha waxbarashada, ardada iyo shaqaalaha inta ay colaaddu jirto:**

   "In lagu dadaallo ururinta macluumaad lagu kalsoon yahay oo heer qarana ah kuna aaddan weerarrada ka dhanka ah xarumaha waxbarashada, dhibbanayaasha weerarka; iskuullada iyo jaamacadaha xilliyada colaadda loo adeegsado ujeedooyinka milateri, ayadoo la isticmaalayo hannaanka dusha kala socoshada iyo ka warramida ee jira; si loo fududeeyo ururinta macluumaadkaas; iyo in la kaalmeeyo dhibbanayaasha ayaga oo aan la kala sooceyn."

3. **Xoojinta dowrka difaaca waxbarashada ee xilliyada colaadda::**

   "In la sameeyo, la ansixiyo oo la hormariyo "waxbarasho la jaanqaadi karta" colaadda oo qeyb ka ah mashaariicda caalamiga ah ee bani'aadannimada iyo hormarinta ee heerka qaran. Waa in la xaqiijiyaa sii socoshada waxbarashada xilliyada ay colaaddu jirto, taageeraa dib u hawlgalinta xarumaha waxbarashada iyo in haddii la awoodo taageero loo fidiyo mashaariicda caalamiga ah ee ku hawlan ka hortagga iyo ka jawaabcelinta weerarrada ka dhanka ah waxbarashada, oo ay ka mid tahay hirgelinta bayaankan."

4. **Hormarinta iyo xoojinta taageerada siyaasadeed ee shirarka caalamiga ah ee lagu difaacayo waxbarashada xilliyada ay socdaan colaadaha**

   "In la taageero dadaallada Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ee ku aaddan carruurta iyo colaadaha hubaysan, wakiilka gaarka ah ee Xoghayaha Guud u qaabilsan arintaas, hay'adaha kale ee Qaramada Midoobay, iyo ururada; in la yeesho kulamo joogta ah, la martiqaado hay'adaha caalamiga ah ee arimahaas ku hawlan iyo bulshada rayidka ah, si dib u eegis loogu sameeyo hirgelinta bayaankan, iyo adeegsiga tilmaamaha."

5. **Isla xisaabtanka ku aaddan weerarrada lala beegsado xarumaha waxbarashada, ardada iyo shaqaalaha xilliyada ay colaadaha jiraan**

   "In la baaro eedeymaha ku aaddan tacaddiyada, si ku haboonna loo maxkamadeeyo kuwa geystay ayadoo la adeegsanayo shuruucda qaran iyo kuwa caalamiga ah ee khuseeya."





# 1. KA HORTAGGA IN CIIDAMADA AY ISKUULLADA IYO JAAMACADAHA ADEEGSADAAN XILLIYADA DAGAALLADU SOCDAAN – ADEEGSIGA *TILMAAMAHA KA HORTAGGA IN CIIDAMADA AY ISKUULLADA IYO JAAMACADAHA ADEEGSADAAN XILLIYADA DAGAALLADU SOCDAAN*

**Waxaan ansixinay Tilmaamaha ka Hortagga in Ciidamada ay Iskuullada iyo Jaamacadaha Adeegsadaan Xilliyada Dagaalladu Socdaan waana:**

**• adeegsan doonnaa tilmaamaha, annagoo sida ugu macquulsan, kuna haboon ugu darayno siyaasadaha gudaha iyo nidaamka hawlgalka;**

Inta badan dalalka ay colaadaha hubaysan saameeyeen tobankii sano ee lasoo dhaafay, ayaa xooggaga dagaallamaya waxa ay iskuullada iyo jaamacadaha u adeegsadeen ujeedooyin milateri, sida inay ka dhigtaan saldhigyo ciidan, keydinta hubka iyo xabsiyo . Falalkaasi ayaa u bedeli kara xarumaha waxbarashada kuwo ciidan, isla markaana sababi kara in ardada iyo shaqaalaha ay la kulmaam weerarro ba'an. Waxaa intaa dheer in joogitaanka ciidamada iyo xooggaga hubaysan ee iskuullada ay dhibaato ku tahay dadaallada lagu xaqiijinayo in waxbarashada ay sii socoto xilliyada colaaddu jirto.[2]

Qaraarrada Golaha Ammaanka ee tirsigoodu yahay 2143 (2014) iyo 2225 (2015)ayaa ugu baaqaya dhammaan dalalka inay qaadaan tallaabooyin wax ku ool ah oo looga hortagayo in iskuullada loo adeegsado ujeedooyin milateri si khilaafsan sharciga caalamiga ah. Tilmaamaha ayaa bixinaya haggid wax ku ool ah si dhinacyada ku lugta leh colaadda looga caawinayo in ay yareeyaan u adeegsiga danaha milateri ee xarumaha waxbarashada iyo inay dhimaan saamaynta ay arintaasi ku yeelan karto ardada, macallimiinta iyo waxbarashada. Tilmaamahan ma aha kuwo abuuraya waajibaad sharci oo cusub oo caalami ah. Taa bedelkeeda waxa looga gol leeyahay inay bedelaan hab-dhaqanka dadka, si loo wanaajiyo ilaalinta maqaamka rayidnimo ee xarumaha waxbarashada, loogana difaaco weerarrada.

## Su'aalaha Hagaya iyo Talooyinka

Go'aanka ah in Tilmaamaha lagu adeegsado nidaamka gudaha iyo kan hawlgalka, sida ku cad Bayaanka Badqabka Iskuullada, ayaa waafaqsan ujeedooyinka Tilmaanta 6, taasoo ku talinaysa in Tilmaamaha ay qeyb ka noqdaan dhaqanka milateri, buuggaagtooda, shuruucda iska horimaadka, awaamirta hawlgalka iyo qaababka kale ee lagu baahin karo, ayadoo la adeegsanayo sida ugu haboon, uguna macquulsan. Tilmaanta 6 ayaa sidoo kale ku talinaysa in dhinacyada ku lugta leh colaadda ay go'aan ka gaaraan qaabka ugu wanaagsan ee ay sidaa ku samayn karaan.

Tilmaamaha ayaa ah kuwa hagaya dhaqamada mas'uuliyadnimada leh, waxaana looga gol leeyahay in dhinacyada ansixinaya ay ku daraan qawaaniintooda, isla markaana waafajiyaan xaaladda jirta. In tilmaamaha lagu daro nidaamka maxalliga ah, "ayagoo laga mid dhigayo siyaasadaha gudaha iyo nidaamka hawlgalka ee khuseeya" ayaa ka dhigan in dhinacyada dagaallamaya ay xaqiijiyaan:

[2] Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada, *Casharrada Colaadda – 2015: U Adeegsiga Iskuullada iyo Jaamacadaha Ujeedooyinka Milateri ee Xilliyada Colaaddu Jirto*, 2015.

Inay fahmaan khatarta mudada dhaw iyo tan fog ee ay ficilladooda u geysan karaan badqabka ardada, macallimiinta iyo guud ahaan waxbarashada;

- In la siiyay amar cad oo ku aaddan in aanay sinnaba ujeedooyin milateri ugu adeegsan karin xarumaha waxbarashada, ama inay ka dhigtaan xalka ugu dambeeya, ayna adeegsadaan mudada ugu kooban marka xarumahaasi aanay ka socon hawlaha waxbarashada;
- In la hago, si falalkooda inta ay colaaddu socoto – haddii ay ahaan lahaayeen weerar ama iska cabin – ay sida ugu macquulsan u badbaadiyaan xarumaha waxbarashada; iyo
- In laga hago qaabka ay ula shaqeynayaan mas'uuliyiinta rayidka ah iyo hay'adaha kale si loo xaqiijiyo in waxbarashada ay si badqabta dib ugu billaabato ama ay usii socoto xilliyada colaaddu jirto.

Hoos waxaa ku qoran liis dheer oo ah su'aalaha hagaya iyo talooyinka gacanta ka siin kara dalalka iyo saamileyda kale inay qiimeyn ku sameeyaan nidaamka maxalliga ah ee jira, ayna ku aqoonsan karaan qaababka lagu xoojin karo, iyo inay caddeeyaan habka ka difaacidda xarumaha waxbarashada in loo adeegsado ujeedooyin milateri ama lagu qaado weerar, ayadoo la raacayo talooyinka lagu qeexay *Tilmaamaha*.

☐ Waa noocee xaaladda colaad ee loo baahan yahay in ciidamada qaranka la **hawlgaliyo**, waa maxay **awooddooda**?

✓ **Talo**: Ku dar qorsheynta hawlgalka milateri, qiimeyn ku aaddan khatarta uu hawlgalkaasi ku yeelan karo xarumaha waxbarashada, ardada iyo macallimiinta (Tilmaamaha iyo Hab-raaca GCPEA, "Fulinta Tilmaamaha",[3] ayaa si wanaagsan u sharraxaya qiimeynta khatartaas), iyo khatarta ay ciidamada kala kulmi karaan u adeegsiga xarumahaasi ujeedooyin milateri, sida saldhigyo, ama hawlo kale.

☐ **Ma jiraan qodobo ka mid ah siyaasadda gudaha** ama nidaamka hawlgalka **ee khuseeya adeegsiga iyo/ama qabsashada xarumaha waxbarashada** (laga guuray ama shaqeynaya) ee xooggaga hubaysan inta uu socdo dagaalka, iyo/ama qaabab lagu ilaalinayo maqaamka rayidnimo ee xarumahaasi?

✓ **Talo: Caddee siyaasadda dowladdaada** ee ku aaddan adeegsiga milateri ee iskullada iyo jaamacadah inta ay socoto colaadda hubaysan, iyo in **siyaaddaasi ay qeexan** tahay haddii aanay sidaa ahayn.

✓ **Talo:** Marka aad qeexeyso siyaasadda dowladdaada ee ku aaddan adeegsiga milateri ee xarumaha waxbarashada, **tixgeli inaad mamnuucdo guud ahaan u adeegsigooda** danaha ciidan xilliyada ay colaaddu jirto, **ama ugu yaraan ku xakamee adeegsigaasi** xarumaha laga guuray ama aan shaqeyneyn, taasoo ah xaaladda ugu dambeysa, qaadanaysana mudada ugu kooban. (Talooyin wax ku ool ah waxaa laga heli karaa *Tilmaamaha* 1 iyo 2.)

✓ **Talo**: Ku dar **tababarka milateriga** iyo buuggaagtooda tusaalooyin wax ku ool ah oo **muujinaya siyaasadda dowladda ee ku aaddan adeegsiga milateri ee iskuullada** (mamnuucid guud ama xakameyn), iyo tallaabooyinka ay qaadi karaan xooggaga hubaysan si ay u dhimaan khatarta ardada iyo macallimiinta kasoo gaari karta adeegsiga hadda iyo kii hore ee xarumaha waxbarashada. (Talooyin wax ku ool waxaa laga heli karaa Tilmaanta 2 iyo Hab-raaca GCPEA, "Fulinta Tilmaamaha".[4])

✓ **Talo:** Xaqiiji in haddii **ciidamada ay hadda adeegsanayaan iskuul ama jaamacad ayadoo ay jirto colaad,** si degdeg ah loogu dhaqaaqo **sixidda xaaladdaasi**, ayadoo sida ku haboon loo raacayo siyaasadda dowladda ee ku aaddan u adeegsiga ujeedooyinka milateri ee xarumaha waxbarashada xilliyada ay colaaddu jirto.

✓ Ma qaateen xooggaga hubaysan tababar ama haggid ku aaddan **taxadarka gaarka ah ka hor inta aan la weerarrin iskuul ama jaamacad** ay ujeedo milateri u adeegsanayaan dhinaca kale (taasina ma noqotay **ujeedo milateri**)?

✓ **Talo:** Ku dar tababarka milateriga iyo buuggaagtooda tusaalooyin wax ku ool ah oo muujinaya **taxadarka gaarka ah ka hor inta aan la weerarrin iskuul ama jaamacad noqday goob milateri.** Waxaa lagu dari karaa, tusaale ahaan, qeybta tababarka ee la xiriirta mabda'a kala soocidda, taxadarka iyo isu dheela tirka weerarka. (Talooyin wax ku ool waxaa laga heli karaa Tilmaanta 2 iyo Hab-raaca GCPEA, "Fulinta Tilmaamaha".[5])

✓ **Talo:** U gudbi saraakiisha ku hawlan qorsheynta iyo fulinta hawlagallada **macluumaadka weerarradii hore ama adeegsiga milateri ee xarumaha waxbarashada** ee deegaanka ay ku sugan yihiin ciidamadaada. Tani waxa ay ka caawinaysaa tixgelinta saamaynta ay yeelan karaan weerarro dheeraad ah ama adeegsiga milateri ee xarumaha waxbarashada ee deegaankaasi, iyo inay si gaar ah uga taxadaraan uga sii daridda xaaladda iyo inay sii xumaato saamaynta mudada dheer ah ee colaadda ay ku yeelato waxbarashada deegaankaasi.

☐ Ma jiraan **tallaabooyin** lagu xaqiijinayo in haddii ciidamada qaran ay waayaan xal kale ayna kusoo biya shubato inay ujeedooyin milateri u adeegsadaan xarunta waxbarashada, **marka ay ka guuraan ay xarunta noqon doonto mid si badqabta u shaqeysa, loona arko goob rayidku leeyihiin?**

✓ **Talo**: Ka dhex diyaari nidaamka dowladeed ee ay ku wada xiriiraan milateriga iyo rayidka tilmaamo cad oo ku aaddan qaabka ay u wada shaqeyn karaan xooggaga hubaysan iyo hay'adaha rayidka ah (dowliga, aan dowliga ahayn ama caalamiga ah) si loo xaqiijiyo in **qiimeyn ku filan lagu sameeyay badqabka xarumaha waxbarashada ee ay ciidamadu adeegsadeen ama la weerarray** iyo in sida ku haboon loo dayactiro ka hor inta aan dib loo furin. (Talooyin wax ku ool waxaa laga heli karaa *Tilmaanta* 2)

✓ **Talo**: Xaqiiji in **xooggaga hubaysan ee ku hawlan dayactirka xarumaha waxbarashada** ee xaaladda ay colaaddu jirto aanay **si aan ula kac ahayn uga dhigin xarunta mid dhinaca kale uu u arki karo goob ciidan.** Waxaa muhiim ah in arintan wadaxaajood lagala yeesho dhinacyada rayidka ah ee qeybta ka ah nidaamka wadashaqeynta milateriga iyo rayidka si loo qiimeeyo, loona dhimo khatartaasi.

☐ **Ciidamada qaranka ma sugaan ammaanka xarumaha waxbarashada** ee deegaannada ay colaaddu ka jirto? Haddii jawaabto haa tahay, xaalad iyo awood noocee ah ayay sidaa ku sameeyaan?

✓ **Talo:** Xaqiiji in go'aannada lagu adeegsanayo ciidamada si loo sugo ammaanka xarumaha waxbarashada ay ku salaysan yihiin qiimeyn xooggan oo lagu sameeyay **khatarta/faa'iidada** ka dhalan karta, isla markaana lagala shaqeeyo hay'adaha ay khuseyso gaar ahaan Wasaaradda Waxbarashada. (Talooyin wax ku ool waxaa laga heli karaa *Tilmaanta* 5.)

[3] Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada, "Fulinta Tilmaamaha: Hab-raac lagu fahmi karo, laguna fulin karo Tilmaamaha ka Difaacidda Iskuullada iyo Jaamacadaha Milateriga Adeegsada Xilliyada Colaadda Hubaysan", 2017.
[4] Isla masdarka.

[5] Isla masdarka.

## Tusaalooyin

Tusaalooyin dheeraad ah waxaa laga heli karaa "Faallada *Tilmaamaha ka Difaacidda Iskuullada iyo Jaamacadaha Milateriga Adeegsada,*"[6] ee GCPEA iyo Warbixinta Human Rights Watch ee 2017, *Ka Difaacidda Iskuulladda U Adeegsiga Milateri: Sharciga, Siyaasadda iyo Dhaqanka Milateri.*[7]

**Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Congo: Amar golaha wasiiradda kasoo baxay oo lagu mamnuucay in ciidamada ay qabsadaan iskuullada**

> "Dhammaan kuwa lagu yeesha dembi ka mid ah kuwa soo socda waxa ay mutaysan doonaan ciqaab iyo edbin adag:....qabsashada iskuullada.....u adeegsiga ujeedooyinka milateri."[8]

**Filibiin: Dastuurka dalka oo si cad xarumaha waxbarashada uga difaacay in loo adeegsado ujeedooyin milateri**

> "Dhismayaasha dadweynaha sida iskuullada....looma adeegsan karo ujeedooyin milateri sida xarun talis, saldhig, xarun roondo iyo keydka saadka ..."[9]

**Colombia: In ujeedooyin milateri loo adeegsado xarumaha waxbarasho oo meel ka dhac ku ah mabda'a kala soocidda iyo taxadarka ee awaamirta ciidan**

> "Ayadoo la eegayo Sharciga Caalamiga ah ee Bani'aadannimada, waxaa xadgudub cad ku ah Mabaadii'da Kala Sooca iyo Taxadarka, isla markaana khalad weyn ah, in taliye uu dego ama oggolaado in ciidankiisa ay degaan.... xarumaha shacabka sida kuwa waxbarashada."[10]

**Switzerland: Sharciga qabyada ah ee ciidamada iyo colaadaha hubaysan oo si cad u difaacaya xarumaha waxbarashada**

> "[Ciidamada Difaaca New Zealand (NZDF)] goorta keliya ee ay ujeedooyin milateri u adeegsadan karaan xarumaha waxbarasha ayaa ah marka ay dantu ku kalifto. Haddii ay taasi dhacdo, waa in la hubiyaa in: (a) Dadka rayidka ah, gaar ahaan carruurta laga difaaco waxyeellada kasoo gaari karta weerarrada ay xarumahaasi la beegsan karaan dhinaca kale – oo ay ka mid tahay in haddii loo baahdo dadkaasi meesha laga saaro; (b) In adeegsigaasi uu qaato mudada ugu kooban; (c) In sida ugu wanaagsan looga taxadaro dhibaatada ay colaadda ku yeelan karto carruurta, gaar ahaan xuquuqda ay u leeyihiin waxbarashada."[11]

**Switzerland: Sharciga qabyada ah ee ciidamada iyo colaadaha hubaysan oo si cad u difaacaya xarumaha waxbarashada**

> "Waa in si gaar ah looga taxadaro xarumaha waxbarashada. Burburintooda waxa ay dhibaato weyn ku noqon kartaa shacabka iyo mustaqbalka dalka. Waxaa intaa dheer in carruurta doonaya difaaca dheeraadka ah nuguylkooda awgii ay ku sugan yihiin iskuullada. Sidoo kale, jaamacadaha iyo xarumaha kale ee tacliinta sare waxa inta badan yaalla alaabo dhaqan. Sidaa darteed, ayadoo la adeegsanayo mabaadii'da taxadarka iyo isu dheela tirka, waa in muhiimad gaar ah la siiyo xarumaha waxbarashada. Waa in laga baaqsado u adeegisooda ujeedooyin milateri. "[12]

**Denmark: Sharciga qabyada ah ee ciidamada oo si cad u difaacaya xarumaha waxbarashada**

> "Difaaca carruurta waxaa qeyb ka ah in la ixtiraamo xuquuqda ay u leeyihiin waxbarashada iwm, gaar ahaan kuwa ku nool deegaannada ay colaaddu saamaysay....Waa in la xakameeyo u adeegsiga iskuullada iyo xarumaha kale ee waxbarashada si loogu taageero hawlgallada milateriga Denmark. Waxa sida gaarka ah diiradda loogu saarayo iskuullada ayaa ah in u adeegsigooda ujeedooyinka milateri ay ka dhalan karto cawaaqib xun, gaar ahaan khatarta degdega ah ee ku iman karta noolasha carruurta iyo dhalinyarada ku nool aagaasi ama gudaha iskuulka iyo weliba saamaynta mudada fog ah ee ay ku yeelan karto carruurta gaartay da'da iskuulka."[13]

**Nepal, Sri Lanka, iyo Myanmar: In dhinacyada ku lugta leh colaadda ee heshiiska nabadeed qaatay ay joojiyaan adeegsiga xarumaha waxbarashada**

> "Labada dhinacba waxay ku heshiiyeen inay damaanad-qaadaan in aan lagu xadgudbin xuquuqda waxbarashada. Waxay isla garteen in si degdeg ah loo soo afjaro qabsashada xarumaha waxbarashada iyo adeegsigooda, [...] iyo in aanay saldhigyo ciidan u samayn qaab waxyeelleyn kara iskuullada [...]".[14]
> "Waa in dhinacyada ay ka baxaan dhismayaasha iskuullada ee ay degan yihiin, dibna loogu celiyo adeegsigii loogu talagalay." [15]
> "Taunadaw iyo Ethnic Armed Organizations waxay ku heshiiyeen in [...] la joojiyo u adeegsiga saldhigyada milater ee xarumaha diinta, iskuullada, kuwa caafimaadka iyo dhismayaashooda, xarumaha leh muhiimadda dhaqan, iyo goobaha dadweynaha."[16]

**Qaramada Midoobay: Nidaamkeeda nabad Ilaalinta oo si cad u mamnuucaya u adeegsiga iskuullada ujeedooyin milateri**

> "Looma oggola ciidamada inay hawlahooda u adeegsadaan."[17]

**Jamhuuriyadda Bartamaha Afrika: Amar ay Qaramada Midoobay ku siisay ciidankeeda nabad ilaalinta iyo booliska inay adeegsiga milateri ka difaacaan xarumaha waxbarashada**

> "3. Waxaa laga codsanayaa ciidanka MINUSCA iyo booliskaba in aanay sinnaba u adeegsan iskuullada. [...]4. Waa mamnuuc in la adeegsado iskuullada iyo jaamacadaha shaqeynaya. Waxaa ka mid ah iskuullada iyo jaamacadaha fasaxa gaaban ama kan dheer ku jira. 5. Waa in si degdeg ah looga guuraa dhismayaasha iskuullada iyo jaamacadaha laha guuray ee ay degan yihiin ciidanka MINUSCA ama booliska, si mas'uuliyiinta waxbarashada ay dib ugu furaan. Waa in meesha laga saaro dhammaan waxyaabaha muujinaya in goobta ay ahayd mid milateri, dayactirna lagu sameeyo burburka looga geystay xarunta ka hor inta aan lagu wareejinta mas'uuliyiinta, si ay ugu adeegsadaan waxbarashada."[18]

**Jamhuuriyadda Bartamaha Afrika: Taxadarka Amarka ay Qaramada Midoobay ku siisay ciidankeeda nabad ilaalinta iyo booliska inay adeegsiga milateri ka difaacaan xarumaha waxbarashada**

> "Waa in askarta milateriga iyo booliska ah ee hawshoodu tahay sugidda ammaanka iskuullada ama jaamacadaha ay sida ugu macquulsan isaga ilaaliyaan gelidda xarumahaasi si aanay wax ugu dhimin maqaamkooda rayidnimo."[19]

---

[6] Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada, "Faallada Tilmaamaha ka Difaacidda Iskuullada iyo Jaamacadaha Milateriga Adeegsada Xilliyada Colaadda Hubaysan", 2015, bogga. 14-17.
[7] Human Rights Watch,,*Ka Difaacidda Iskuulladda U Adeegsiga Milateri: Sharciga, Siyaasadda iyo Dhaqanka Milateri* , 2017.
[8] Amarka wasiiradda ee hirgelinta Qorshaha Waxqabadka, Waaxda Difaaca Qaran iyo Halyeeyada, NoVPM/MDNAC/CAB/2089/2012, Nofembar 3, 2012.
[9] RA No. 7610, Xeer si adag uga hortagaya, difaac gaar ahna ka siinaya carruurta xadgudubyada, ku shaqeysiga, iyo faquuqa, ciqaab adagna marinaya kuwa ku xadgudba Juun 17, 1992, qodobka. X(22)(e).
[10] Taliyaha Guud ee Ciidamada Milateriga, amarka July 6, 2010, lambarka rasmiga ah ee dukumiintiga 2010124005981 / CGFM-CGING- 25.11.
[11] Sharciga qabyada ah ee Ciidamada Qalabka Sida (daabacaadda labaad), Majallada 4.
[12] Sharciga colaadaha hubaysan ee Ciidamada Qalabka Sida ee Switzerland, qabyada la cusbooneysiiyay.

[13] Sharciga Hawlgallada Caalamiga ah ee Ciidamada Qalabka Sida ee Denmarka Sebtembar 2016, bogga. 45, 115, & 154.
[14] Heshiiska Nabadeed ee dhexmaray dowladda Nepal iyo Xisbiga Shuuciga ah ee Nepal (Maoist), 2006.
[15] Heshiiska Xabbad-joojin ee dhexmaray dowladda Sri Lanka iyo jabhadda Liberation Tigers of Tamil Eelam, 2002, qodobka. 2.3.
[16] Heshiis xabbad-joojin dalka oo dhan ah oo dhexmaray Dowladda Myanmar iyo Ethic Armed Organizations, 2015
[17] Waaxda Qaramada Midoobay ee Hawlgallada Nabad ilaalinta, Waaxda Qaramada Midoobay ee Taageeridda Deegaanka, Buugga Ciidamada Lugta ee Qaramada Midoobay, Majallada,I, Agoosto 2012, qeybta 2.13 (waxaa la eegay 15-kii July 2016)
[18] Hawlgalka Qaramada Midoobay ee Xasillinta Jamhuuriyadda Bartamaha Afrika, MINUSCA/OSRSG/046/2015, Disember 24, 2015.
[19] Kor lagu xusay.

**Qaramada Midoobay: Daraasad xaalad oo ku aaddan tababarka difaacidda carruurta iyo u adeegsiga iskuulladda ujeedo milateri ee la siiyo nabad ilaaliyayaasha Qaramada Midoobay**

"Waxaa lagugu wargeliyay in urur hubaysan oo diiddan hannaanka nabada, isla markaana ku kacsan Qaramada Midoobay ay weerarro ka geysteen meel fog oo ka tirsan [deegaanka aad mas'uulka ka tahay] una dhaw soohdinta. Waxaad go'aansatay inaad deegaanka geyso Saldhigga Guurguura ee Hawlgalka (MOB). Marka ay unugta tuulada gaartay, ayaa gudoomiyaha halkaasi waxa uu dugsi hoose/dhexe u aqoonsaday halka ay unugta degi karto.[20]

- Muxuu yahay amarka aad siinayso taliyaha unugta, sabab? (...)
- Ka warran haddii ciidanka dalka martida loo yahay ee la dagaallamaya ururkaasi ay fariisin ku leeyihiin iskuulka, ayna unugta ku martiqaadaan inay ku biirto hawlgalkooda?

Ogow in marxaladda aanay ka dhigneyn weerar ka dhan ah iskuulka, balse ay tahay adeegsigiisa. Waxaa mamnuuc ah in nabad ilaaliyayaasha Qaramada Midoobay ay adeegsadaan iskuullada. Ciidamada dowladdase waxaa loo oggol yahay inay iskuulka adeegsadaan haddii ay xal kale waayaan, balse waa in taasi ay noqotaa mid laga fursan waayay. Sidaa awgeed, waa in nabad ilaaliyayaasha Qaramada Midoobay ay u ololeeyaan in dhammaan xooggaga hubaysan ay ka baxaan iskuulka oo ay meel kale raadsadaan.

Waa in doodda (...) ay kasoo baxaan jawaabahan:

- Muxuu yahay amarka aad siinayso taliyaha unugta, sabab? Nabad ilaaliyayaasha Qaramada Midoobay waxaa mamnuuc ka ah inay inay iskuullada u adeegsadaan ujeedooyin milateri. Buugga Ciidamada Lugta ee Qaramada Midoobay ayaa si cad u mamnuuca in ciidamada ay adeegsadaan iskuullada (Majallada 1, 2.13 – difaaca carruurta).
- Ka warran haddii ciidanka dalka martida loo yahay ee la dagaallamaya ururkaasi ay fariisin ku leeyihiin iskuulka, ayna unugta ku martiqaadaan inay ku biirto hawlgalkooda? Waa in taliyaha unugta uu wargeliyaa La taliyaha Difaaca Carruurta[21] uuna siiyaa macluumaadka muhiimka ah: – Magaca/deegaanka iskuulka – Magaca tuulada – Cutubka ka tirsan ciidamada dowladda ee iskuulka degan – Tirada askarta – Tirada iyo noocyada hubka – Magaca iyo taliyaha cutubkaasi, iwn. 4. Waa in taliyaha unugta nabad ilaaliyayaasha uu u ololeeyaa in cutubka uu si degdeg ah uga guuro iskuulka. Joogitaanka ciidankaasi ayaa waxa uu khatar geliyaa iskuulka oo lala beegsan karo weerarro ama lagu burburin karo dagaalka."[22]

**Luxembourg: Ballanqaad ah inay tilmaamaha ku dhaqangeliso sharciga iyo dhaqanka milateri**

"Luxembourg waxa ay xaqiijinaysaa go'aankeeda ku aaddan inay Tilmaamaha ka Difaacidda Iskuullada iyo Jaamacadaha Milateriga Adeegsada Xilliyada Colaadda Hubaysan ku darto buuggaagta dhaqanka ee milaterigeeda, shuruucda iska horimaadka, awaamirta hawlgalka iyo qaababka kale ee lagu faafin karo."[23]

**Slovenia: Ballanqaad ah inay tilmaamaha ku dhaqangeliso tababarka milateri iyo fikradaha isbedel ku samaynta ammaanka Midowga Yurub iyo NATO**

"Slovenia waxa ay Tilmaamaha ku dari doontaa tababarka xubnaha rayidka ah iyo milateriga loo fidiyo ka hor inta aanay ka qeyb qaadan hawlgallada caalamiga ah iyo buugga gacanta ee Sharciga Caalamiga ah ee Bani'aadannimada ee Ciidanka Qalabka Sida ee Slovenia. Waxa ay Slovenia sidoo kale ku dadaalli doontaa in *Tilmaamaha* lagu daro isbedelka ammaan ee lagu samaynayo fekerka iyo hawlgallada Midowga Yurub iyo NATO."[24]

[20] Saldhig Hawlgallada Kumeelgaarka ah
[21] La taliyaha Difaaca Carruurta
[22] Waaxda Qaramada Midoobay ee Hawlgallada Nabad ilaalinta, Hagaha Tababaraha, Macluumaadka Tababarka Gaar ah ee Difaaca Carruurta ee Nabad ilaaliyayaasha, modulka 6-aad, bogga 144-145.
[23] Shirka Caalamiga ah ee bani'aadannimada 2016, Go'aanka Siyaasadeed 213039.
[24] Warqad ka timid xoghayaha wasaaradda arimaha dibedda ee Slovenia ee ku socotay dhiggiisa wasaaradda arimaha ee Norway, kuna qorneyd taariikhda 12-kii Abrill 2016.



**Talyaaniga: Ballanqaad ah inuu tilmaamaha ku dhaqangeliyo sharciga gudaha iyo dhaqanka milateri**

"Talyaanigu waxa uu wadi doonaa inuu meelmariyo shuruucda gudaha ee mamnuucaya/xakameynaya u adeegsiga ujeedooyinka milateri ee goobaha cibaadada iyo waxbarashada."[25]

"Talyaanigu waxa uu taageeri doonaa in *Tilmaamaha ka Difaacidda Iskuullada iyo Jaamacadaha Milateriga Adeegsada Xilliyada Colaadda Hubaysan* lagu daro buuggaagta dhaqanka milateri iyo qaababka kale ee lagu faafin karo.."[26]

**Norway: Ilaalinta maqaamka rayidnimo ee xarumaha laba qaab loo adeegsanayo xilliyada colaadda**

"Inta badan saldhigyada ciidamada Norway ayaa ku yaal meelo aanay dadka ku badneyn. Deegaannadaasi waxaa ku yaal goobo laba qaab loo adeegsado, oo ah kuwo ay leeyihiin ciidamada balse ay adeegsadaan bulshada maxalliga ah maadaama aanu dhaqaalaha saamaxayn in guryo badan la dhiso. Mararka qaar dhismayaashaasi waxaa loo adeegsadaa waxbarashada. Tusaale ahaan, xarumaha jir dhiska ee ay iskuulladu adeegsadaan ayaa waxaa sidoo kale ku tababarta ciidamada. ....Hannaanka hirgelinta Tilmaamaha ayaa waxaa ka mid ah in Wasaaradda Gaashaandhigga ay u fasirtay sidan:....Haddii ciidamada ay leeyihiin dhismayaal laga kireeyay xarumaha waxbarashada rayidka ah, waa in heshiiska kirada ee mustaqbalka lagu daro qodob ku saabsan inay ka bixi doonaan haddii uu dagaal hubaysan ka dhaco carriga Norway."[27]

**Ecuador: Xurmeynta dhismayaasha jaamacadaha iyo cunaqabateynta kuwa ku xadguduba**

"Laguma xadgudbi karo jaamacadaha iyo iskuullada farsamada, lamana baari karo marka laga reebo inay yihiin guri shakhsi, sida ku cad dastuurka iyo sharciga. Waa in loo adeegsado oo keliya fulinta ujeedada loo sameeyay sida ku cad sharciga.

Mas'uuliyiinta xarumahaasi waxbarashada ayay mas'uuliyad ka saaran tahay kormeerka iyo ilaalinta kala dambeynta gudaha. Haddii loo baahdo in ciidamada ay sugaan ammaanka, waa in wakiilka sharciga ee xaruntaasi uu ka codsadaa cidda ku haboon, isla markaana uu ku wargeliyaa maamulka sare ee waxbarashada.

Kuwa ku xadgudba xarumahaasi waxbarashada waxa loo ciqaabi doonaa si waafaqsan sharciga."[28]

## Macluumaad muhiim ah

Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada, *"Faallada Tilmaamaha ka Difaacidda Iskuullada iyo Jaamacadaha Milateriga Adeegsada Adeegsada Xilliyada Colaadda Hubaysan"*, 2015

Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada, *"Su'aallo iyo Jawaabo ku Saabsan Bayaanka Badqabka Iskuullada "*, 2017.

Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada, *"Fulinta Tilmaamaha: Hab-raac lagu fahmi karo, laguna fulin karo Tilmaamaha ka Difaacidda Iskuullada iyo Jaamacadaha Milateriga Adeegsada Xilliyada Colaadda Hubaysan"*, 2017.

Human Rights Watch,,*Ka Difaacidda Iskuulladda U Adeegsiga Milateri: Sharciga, Siyaasadda iyo Dhaqanka Milateri*
,

[25] Shirka Caalamiga ah ee bani'aadannimada 2016, Go'aanka Siyaasadeed 207055
[26] Shirka Caalamiga ah ee bani'aadannimada 2016, Go'aanka Siyaasadeed 207069
[27] Qeyb ka mid ah khudbo ay Shirka Oslo ee Badqabka Iskuullada, May 29, 2015 ka jeedisay Wasiirka Gaashaandhigga Norway Ine Eriksen Søreide. Eeg Warbixinta Shirka Oslo ee Badqabka Iskuullada, Wasaaradda Arimaha Dibedda, Oslo, Norway, 2015, bogga 19.
[28] Ley Orgánica de Educación Superior. República del Ecuador. Registro Oficial Suplemento 298 de 12-oct. 2010. Art. 19.

# 2. URURINTA MACLUUMAADKA IYO CAAWINTA DHIBBANAYAASHA WEERARRADA LOO GEYSTO WAXBARASHADA INTA AY COLAADDU JIRTO, SIDA ARDADA IYO SHAQAALAHA

- **In lagu dadaallo ururinta macluumaad lagu kalsoon yahay oo heer qarana ah kuna aaddan weerarrada ka dhanka ah xarumaha waxbarashada, dhibbanayaasha weerarka; iskuullada iyo jaamacadaha xilliyada colaadda loo adeegsado ujeedooyinka milateri, ayadoo la isticmaalayo hannaanka dusha kala socoshada iyo ka warramida ee jira; si loo fududeeyo ururinta macluumaadkaas; iyo in la kaalmeeyo dhibbanayaasha ayaga oo aan la kala sooceyn**

Ururinta macluumaadka joogtada ah ee habaysan ayaa waxa ay gacan ka geystaa in la ogaado baahida jirta iyo halka ay tahay in la gaarsiiyo gurmadka socda. Sababta loo sameeyo falanqeynta ayaa ah in la fahmo xaaladda (sida nooca weerarka, waxa dhaliyay, iyo soo noq-noqoshadiisa), inta uu gaarsiisan tahay weerarka lagu qaaday waxbarashada iyo xarumaha tacliinta ee ay adeegsadaan ciidamada, si loo diyaariyo isla markaana loo fuliyo tallaabooyinka difaaca.

Sanadkii 2005, Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ayaa sameeyay Hannaanka Kormeerka iyo Ka Warramida (MRM) kaasoo lagu ururiyo, laguna hubiyo macluumaadka ku aaddan lix nooc oo ah tacaddiyada waaweyn ee ka dhanka ah carruurt ee ay geystaan xooggaga hubaysan. Waxaa tacaddiyadaasi ka mid ah weerarrada lagu qaado iskuullada. Tan iyo 2011, sida ku cad Qaraarka Golaha Ammaanka ee tirsigiisu yahay 1998 (2011), dhinacyada ku lugta leh colaadda ee weerarrada u geysta iskuullada ama ku hanjaba inay weerarrayaan dadka la dhawray ee xiriirka la leh iskuullada, ayaa waxaa lagu dari karaa lifaaqa warbixinta sanadlaha ah ee uu Xoghayaha Guud ee Qaramada Midooba uga warramo carruurta iyo colaadaha. Adeegsiga milateriga ee xarumaha waxbarashada ayaan ka mid ahayn waxyaabaha keeni kara in dhinac lagu daro liiskaasi, balse waxa uu ka mid yahay arimaha lagula socdo hannaanka MRM.

Waa in ciidamada dowladda ay taliskooda qaran ku wargeliyaan weerarrada ka dhanka ah iskuullada iyo jaamacadaha, adeegsiga iskuullada ee ciidamada dowladda iyo kuwa kale ee hubaysan, hakad gelinta waxbarashada ee ciidamada dowladda iyo kuwa kale ee hubaysan ee ka dhaca deegaannada ay collaada ka jirto. Haddii ay suuragal tahay, waa in sidoo kale falalkaasi lala socodsiiyaa hannaanka MRM ee Qaramada Midoobay iyo/ama maamullada waxbarashada ee heer deegaan iyo heer qaranba.

Waxaa muhiim ah in la helo hannaan shaqeynaya oo si wanaagsan loogula socdo falalka ciidamada dowladda iyo dhinacyada kale ee qeybta ka ah colaadaha hubaysan, si loo xaqiijiyo in dadka ay waxyeellada kasoo gaartay weerarrada loo geysto xarumaha waxbarashada ay helaan daryeel iyo kaalmo ku haboon.

## Su'aalaha Hagaya iyo Talooyinka

Hoos waxaa ku qoran liis dheer oo ah su'aalaha hagaya iyo talooyinka gacanta ka siin kara dalalka iyo saamileyda kale inay hirgeliyaan ballanqaadka ku aaddan ururinta macluumaadka iyo taakuleynta dhibbanayaasha weerarrada loo geysto waxbarashada:

☐ Miyay dowladdaadu ururisaa macluumaadka weerarrada ama adeegsiga milateri ee loo geysto iskuullada iyo jaamacadaha, macluumaad jinsiga ku salaysan oo ah weerarrada ka dhanka ah ardada iyo macallimiinta, iyo sidoo kale waxa ay ka qabatay falalkaasi ka dhacay deegaannada ay colaadu ka jirto ee la geeyay ciidamada qaranka?

✓ **Talo**: Samee falanqeyn ku saabsan xogta si aad u ogaato macluumaadka laga hayo weerarrada iyo adeegsiga milateri ee xarumaha waxbarashada. Adigoo ku salaynaya falanqeyntaasi iyo qorshaha dusha kala socoshada, intii mudda ah isha ku hay weerarrada iyo adeegsiga milateri ee lagula kaco iskuullada, gaar ahaan isbedelka ku yimaada xogta (cidda geysatay, kala duwanaanshaha, heybta iyo waxa sababay) iyo sidoo kale hirgelinta mashaariicda iyo siyaasadaha difaaca.

✓ **Talo**: Ku dar warbixinnada dowladda **heshiisyada khuseeya ee guddiyada iyo hannaanka kormeerka, dadaallada ku aaddan kormeerka iyo ka hortagga weerarrada, iyo ka difaacidda weerarrada iyo adeegsiga milateriga ee xarumaha waxbarashada**, ardada iyo macallimiinta ee **deegaannada ay ciidamadaada joogaan xilliyada ay colaaddu jirto**. Heshiisyada khuseeya guddiyada iyo hannaanka kormeerka waxaa ka mid ah: Guddiga Xuquuqda Dhaqaalaha, Bulshada iyo Dhaqanka, Guddiga Xuquuqda Aadanaha, Guddiga Xuquuqda Carruurta, Guddiga Baabi'inta Fuquuqa Ka Dhanka ah Dumarka, iyo Dib-u-eegista caalamiga ah ee waqtiyaysan.

☐ Ciidamadaadu ma u **tababaran yihiin inay aqoonsadaan, kuna wargeliyaan** dhiggooda rayidka ah **weerarrada iyo adeegsiga milateri ee loo geysto xarumaha waxbarashada** ee deegaannada ay ku sugan yihiin?

✓ **Talo**: Diyaari warbixin oo ku aaddan weerarrada iyo adeegsiga milateri ee lagula kaco xarumaha waxbarashada. Waa in warbixinta ay ku jiraan magaca iyo deegaanka iskuulka, macluumaad ku saabsan maamulka iyo nooca iskuulka, iyo sidoo kale jinsiga ardada. Haddii weerarka la aqoonsaday, waa in la sheegaa xilliga uu dhacay, hubka loo adeegsaday, iyo inay ka dhasheen boob, qorosho, afduub ama tacaddiyo galmo. Waa in sidoo kale la sheegaa heybta dadka geystay weerarka. Waa in warbixinta lagu daraa qiimeyn lagu sameeyay khasaaraha muuqda ee ka dhashay weerarka iyo in xarunta ay u xirantay weerarkaasi awgii.

✓ **Talo**: Ku dar tabarka ka horreeya diridda ciidanka ama Nidaamka Hawlgalka Caadiga ah **haggida ciidamada ee qaabka lagu darto loogana warbixiyo weerarrada** ama khatarta weerar ee kusoo wajahan xarumaha waxbarashada ee deegaannada ay colaaddu ka jirto. Waxaa muhiim ah xaqiijinta in haggida ay ka mid yihiin **xafidaada xogta** iyo qaabka loola dhaqmayo carruurta iskuulka ama dhibbanayaasha kale ama dadka goobjooga u ahaa weerarka iyo sidoo kale macluumaadka ku saabsan **iskaashiga lala samaynayo hay'adaha rayidka** ah ee ay arintu khuseyso ee ku hawlan kormeerka ama ka falcelinta weerarrada lala beegsado xarumaha waxbarashada.

☐ Haddii **Hannaanka MRM ee Qaramada Midoobay ay kula socoto tacaddiyada waaweyn ee ka dhanka ah carruurta** uu ka jiro dalkaaga, shaqaalaheedu **ma gaari karaan dhammaan deegaannada ay dhibaatooyinka ka dhaceen iyo dhinacyada ay khuseyso**, si ay macluumaadka u ururiyaan xilliga ku haboon, ayna u hubiyaan kiisaska weerarrada iyo adeegsiga milateri ee lagula kaco iskuullada?[29]

[29] Faahfaahin dheeraad ah oo ku aaddan hannaanka MRM ka eeg qeybta 4-aad ee hoose.

- ✓ **Talo**: U fududee shaqaalaha Qaramada Midoobay inay kormeeraan ayna hubiyaan weerarrada iyo adeegsiga milateri ee ka dhanka ah iskuulka.

---

- ☐ Dowladdaadu **kaalmo (toos ah ama mid dhaqaale ama mid farsamo**) ma siisaa **dhibbanayaasha weerarrada iskuullada iyo jaamacadaha deegaannada colaaddu ka jiro**, gaar ahaan daryeel caafimaad, xannaaneyn iyo taageero maskaxeed, in iskuullo kale la geeyo ama waxbarasho bedel ah? Haddii jawaabtu haa tahay, qaab noocee ah ayaa lagu soo xushaa dhibbanayaasha kaalmadaasi ka faa'iideysanaya?

---

- ✓ **Talo**: Ku dar **kaalmeynta dhibbanayaasha weerarrada** ka dhaca iskuullada iyo jaamacadaha **mashaariicda bani'aadannimada** ee ay fuliso ama taageerto dowladdaada. Xaqiiji in taageerada ay waafaqsan tahay baahida kala duwan ee ragga iyo dumarka.
- ✓ **Talo**: U samee mashaariicda kaalmada ah **hannaan ilaalin iyo qaabeyn ah** si loo xaqiijiyo in gargaarka loogu talagay dhibbanayaasha weerarrada lala beegsado xarumaha waxbarashada ee deegaannada ay colaadda ka jirto ay si siman u lehaan rag iyo dumarba, iyo in si aan kala sooc lahayn kaalmada loo gaarsiiyo dhibbanayaasha weerarrada noocaasi ah iyo kuwa u baahan adeegyada la midka ah.

## Tusaalooyin

### Hagidda Qaramada Midoobay ee nooca macluumaadka loo baahan yahay si loo diiwaangeliyo weerarrada loo geysto iskuullada iyo dadka lagu dhawray nidaamka Qaraarka Golaha Ammaanka ee tirsigiisu yahay 1998 (2011)

"Marka laga hadlayo weerarrada muuqda ee loo geysto iskuullada iyo cisbitaallada, waxaa muhiim ah in la helo macluumaadka soo socda si loo diiwaangeliyo dhacdadaasi:

- Waa kee iskuulka ama cisbitaalka la beegsaday, gaar ahaan magaca iskuulka ama cisbitaalka, deegaanka uu ku yaal (gobolka, degmada/tuulada, wadada ama tilmaanta xaafadda), maamulka (dowlad/gaar loo leeyahay), nooca (joogta ah, kumeelgaar ah, guurguura) iyo in loo adeegsaday ujeedooyin milateri;
- Waa kuma ururka geystay weerarkaasi, gaar ahaan haddii ay suuragal tahay cutubka iyo taliyaha ku lugta leh, iyo sidoo kale soo noq-noqoshada weerarrada ay geystaan cutubyo ama taliyayaal gaar ah;
- Goorta uu weerarka dhacay, gaar ahaan taariikhda, maalinta iyo in xarunta ay furneyd, xirneyd, laga guuray ama loo adeegsanayay ujeedo milateri, iyo in carruur, shaqaalaha waxbarashada ama kuwa caafimaadka ay ku sugnaayeen goobta xilliga uu weerarka dhacayay;
- Qaabka xarunta loo weerarray, gaar ahaan qaabka uu dagaalka u dhacay, mudada uu weerarka socday, in digniin la sii bixiyay, iyo weliba go'aanka hordhaca ah ee ku aaddan in weerarka uu ahaa mid ula kac ah ama aan loo meeldayin;
- Saamaynta uu reebay weerarka, gaar ahaan burburka dhismayaasha, qalabka iyo awoodda ay xarunta u yeelan karto inay shaqeyso weerarka ka dib, tirada carruurta ee waxbaranaysay ama la dawaynayay ka hor iyo ka dib weerarka, iyo barakaca uu sababay weerarka."[30]

"Weerarrada ka dhanka ah dadka xuquuqdooda la ilaaliyay ee xiriirka la leh iskuullada iyo cisbitaallada ayaa waxaa ka mid ah dilka, dhaawaca, afduubka iyo gabbaad ka dhigashada shaqaalaha waxbarashada iyo caafimaadka. Marka la diiwaangelinayo, lana xaqiijinayo macluumaadka ku aaddan weerarrada, waxaa muhiim ah in sida ugu macquulsan loo ogaado heybta dhibbanayaasha, gaar ahaan inay si toos ah uga qeyb qaadanayeen colaadda ama ay geysteen fal dhibaato ku ah cadowga, da'dooda, jinsigooda, qabiilkooda, diintooda, inay yihiin dadka laga tirada badan yahay, maqaamkooda bulsho-dhaqaale, xiriirka la rumaysan yahay inay la leeyihiin dhinacyada dagaallamaya, hanjabaad horay loogu sameeyay ama dhacdooyin ay ku lug lahaayeen dhinacyada colaaddu u dhexeyso. Waxaa intaa dheer inay muhiim tahay in marka uu qofka ka badbaado weerarka, la diiwaangeliyo xajmiga dhaawaca soo gaaray, awoodda ama rabitaanka qofkaasi uu kusii wadan karo xirfaddiisa waxbarashada ama caafimaadka, ama in dadka ay ku barakaceen weerarka."[31]

### Wadashaqeynta ka dhexeysay shacabka iyo milateriga ee dusha kala socoshada xiisadaha ka dhashay waxbarashada ee colaadda Georgia/ Abkhazia

"Siyaasadaha ku aaddan kuuqada iskuulka ayaa ahaa kuwo dhaliyay xiisad intii ay socotay colaaddii Georgia/Abkhazia ee 1997. (…) Koox ka koobneyd saddex kormeerayaaL xuquuqda aadanaha ah oo qeyb ka ahaa nabad ilaaliyayaasha Qaramada Midoobay halkaa ka joogay, ayaa la daalaa dhacay inay gaaraan dhulka looga baahnaa inay kasoo warramaan, amni darro iyo awood la'aan awgeed. Taa bedelkeed, in ka badan 100 kormeerayaasha milateri ee Qaramada Midoobay, isla markaana tasiilaad badan haysta ayaa dusha kala socday heshiiska xabbad joojinta. Inta badan, waxay warbixinnadooda maalinlaha ah ku sheegi jireen in "aanay jirin wax laga warramo" oo ku aaddan tacaddiyada xuquuqda aadanaha. (…) Goobjoogayaasha milateri uma aanay arag xiisadda ka taagneyd qeybta waxbarashada mid dhibaato ku ah ammaanka, isla markaana lagalama hadlin inay eegaan. Kormeerayashaa ayaa isku dayay inay arinta ku bedelaan shir ay u qabteen dhammaan goobjoogayaasha milateri, kaasoo ku saabsanaa arimaha xuquuqda aadanaha, gaar ahaan waxbarashada. Markaa ka dib ayay goobjoogayasaha ogaadeen in luuqada iskuulka ay sabab u ahayd xiisadda iyo rabshadda ka taagneyd deegaanno xasaasi ah. Ka dib waxa ay billaabeen inay ku daraan macluumaadkaasi iyo tacaddiyada la xiriira ee xuquuqda aadanaha warbixinnada ay xaaladda uga hadlayaan. [Arinta xiisadda la xiriirta luuqada iskuulka] ayaa la gaarsiiyay taliska milateri iyo warbixinnada siyaasadeed ee loo diro Wakiilka Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Taasi ayaa dhalisay in lagala hadlo maamullada Georgian iyo Abkhazia." [32]

### Dowrka ciidamada nabad ilaalinta Qaramada Midoobay ee dusha kala socoshada tacaddiyada waaweyn ee ka dhanka ah carruurta, gaar ahaan weerarrida iskuulllada

"Qaramada Midoobay ayaa nidaam gaar ah oo difaac ah, hannaanka MRM, u samaysay carruurta ku nool goobaha ay colaadaha ka jiraan, waxaana nidaamkaasi qeyb ka ah hawlgallada nabad ilaalinta ilaa xubnaha Golaha Ammaanka. Ciidamada nabad ilaalinta ayaa dowr muhiim ah ku leh nidaamkan, maadaama ay yihiin tallaabada ugu horreysa ee la qaadayo. Ciidamada nabad ilaalinta, oo ah indhaha iyo dhagaha Qaramada Midoobay ugu jooga goobta, ayaa arki kara carruur askar loo qoronayo, kuwo lagula kacayo tacaddiyp galmo, dilka iyo dhaawaca carruurta, weerarrada ka dhanka ah iskuullada iyo cisbitaallada ama afduubka carruurta. Haddii ay jiraan dhacdooyin gaar ah oo la xiriira carruurta, isla markaana lagu soo wargeliyay ciidamada nabad ilaalinta, waa in ay xogtaasi la wadaagaan sarkaalka ugu dhaw ee difaaca carruurta ama ay u gudbiyaan hay'adaha ilaalinta xuquuqda carruurta (sida UNICEF) si ay usoo diraan kormeerayaal tababaran. Haseyeeshee looma baahna in ciidanka uu si toos ah su'aallo u weydiiyo carruurta ama uu baaritaan ku sameeyo dhacdadaasi." [33]

## Macluumaad muhiim ah

Xafiiska Wakiilka Gaarka ah ee Xoghayaha Guud u qaabilsan Carruurta iyo Colaadaha Hubaysan, Qoraalka Hagidda Qaraarka Golaha Ammaanka ee tirsigiisu yahay 1998 (2011), New York, Mey 2014.

Kooxda Waxbarashada Caalamiga ah, Difaacidda waxbarashada dalalka ay colaaddu saamaysay, buugga 7 – Dusha kala socoshada iyo ka warramida, Oktoobar 2012

Tilmaamaha Guddiga Joogtada ah ee hay'adaha isku dhafka ah u qaabilsan Caafimaadka Dhimirka iyo Taageerada Maskaxeed ee xaaladaha degdega ah, 2007

Hab-raaca arimaha muhiimka ah ee INEE: Taageerada Maskaxeed

---

[30] Xafiiska Wakiilka Gaarka ah ee Xoghayaha Guud u qaabilsan Carruurta iyo Colaadaha Hubaysan, Qoraalka Hagidda Qaraarka Golaha Ammaanka ee tirsigiisu yahay 1998 (2011), New York, Mey 2014 (waxaa la eegay July 15, 2016).
Qoraalka Hagidda ayaa si gaar ah loogu talagalay dhinacyada ku hawlan ururinta macluumaadka si waafaqsan nidaamka MRM ee Qaramada Midoobay, waxaana uu tilmaan wax ku ool ah ka bixinayaa nooca macluumaadka la ururinayo ee muhiimka u ah dhinacyada aan ku lugta lahayn nidaamka MRM.

[31] Kor lagu xusay, bogga. 9.

[32] Kooxda Waxbarashada Caalamiga ah, Difaacidda waxbarashada dalalka ay colaaddu saamaysay, buugga 7 – Dusha kala socoshada iyo ka warramida, Oktoobar 2012, bogga. 14 (waxaa la eegay July 15, 2016).

[33] Waaxda Qaramada Midoobay ee Hawlgallada Nabad ilaalinta, Waaxda Qaramada Midoobay ee Taageeridda Deegaanka, Buugga Ciidamada Lugta ee Qaramada Midoobay, Majallada,I, Agoosto 2012, bogga 104 (waxaa la eegay 15-kii July 2016)

# 3. XOOJINTA DOWRKA DIFAACA WAXBARASHADA EE XILLIYADA COLAADDA:

- **Waa in la xaqiijiyaa sii socoshada waxbarashada xilliyada ay colaaddu jirto, taageeraa dib u hawlgalinta xarumaha waxbarashada iyo in haddii la awoodo taageero loo fidiyo mashaariicda caalamiga ah ee ku hawlan ka hortagga iyo ka jawaabcelinta weerarrada ka dhanka ah waxbarashada, oo ay ka mid tahay hirgelinta bayaankan.**
- **In la sameeyo, la ansixiyo oo la hormariyo "waxbarasho la jaanqaadi karta" colaadda oo qeyb ka ah mashaariicda caalamiga ah ee bani'aadannimada iyo hormarinta ee heerka qaran.**

Waxaa muhiim ah xaqiijinta in waxbarashada ay sii socoto xilliyada ay colaadaha jiraan, maadaama ay dhimayso hakad gelinta tacliinta, isla markaana ay keeni karto hannaan, joogteyn iyo taageero ardada ka caawin karta inay u adkeystaan colaadda, ayna ka kabsadaan dhibaatooyinka maskaxeed iyo niyad jabka. Inta ay colaaddu socoto, ayaa iskuullada badka qaba waxa ay carruurta iyo dhalinyarada u sahlaan inay si fudud ku helaan adeegyada bani'aadannimo, iyo macluumaad muhiim u ah sidii looga difaaci lahaa ka ganacsigooda, tacaddiyada galmada iyo inay qortaan xooggaga hubaysan. Hakad gelinta waxbarashada ayaa hoos u dhigi karta suuragalnimada ah in carruurta ay kusoo laabtaan iskuulka, xataa marka dib loo furo, mustaqbalka fogna waxa ay saamayn kartaa dakhliga qofka iyo awoodda dalka uu u leeyahay inuu dib u dhiso dhaqaalihiisa qaran.

Diyaarinta siyaasado iyo barnaamij waxbarasho kuwaasoo yareynaya xiisadda ka dhex dhalan karta dhinacyada, isla markaana xoojinaya isu dhawaanshaha bulsho ee dhinacyadaasi, ayaa gacan ka geysta nabadeynta, waxaana ay hoos u dhigaan suuragalnimada ah in mustaqbalka xarumaha waxbarashada la weerarro ama loo adeegsado ujeedooyin milateri. Sinnaan la'aan dhanka waxbarashada ah ayaa xiisad ka dhex abuuri karta dhinacyada ama shacabka iyo dowladda. Marka loo arko iskuullada inay qeyb ka yihiin dowladda, taasoo tabasho badan loo hayo, ayaa waxa ay u nuglaan karaan weerarrada. Siyaasadaha iyo barnaamijta la jaanqaadi kara colaadda ayaa eega dhibaatooyinka la xiriira luuqada ardada wax lagu baro, kala sooca helitaanka waxbarashada, shaqaaleynta iyo waxyaabaha ku jira manhajka. Waxay diyaariyaan manhaj iyo hab lagu hormarin karo ammaanka, adkeysiga iyo isu soo dhawaanshaha bulsho, sidaa darteedna waxa ay gacan ka geysan karaan in dhammaan beelaha oo dhan ay si siman u helaan waxbarasho tayo leh.

## Su'aalaha Hagaya iyo Talooyinka

Hoos waxaa ku qoran liis dheer oo ah su'aalaha hagaya iyo talooyinka gacanta ka siin kara dalalka iyo saamileyda kale inay hawlgaliyaan ayna meelmariyaan go'aannada ku aaddan sii socoshada waxbarashada ee xilliyada colaadda, dib u hawlgalinta xarumaha waxbarashada, tacliinta la jaanqaadi karta colaadda, kaalmada iyo iskaashiga caalamiga ah:

☐ Miyay dowladdaadu taageertaa ama meelmarisay **qorshaha suuragalnimada** si ay u yareyso khatarta ku iman karta xarumaha ku yaal goobaha ay colaaddu saamaysay, iyo **soo celinta helitaanka waxbarashada** ama **fulinta waxbarasho tayo leh oo bedel ah** taasoo ay helaan wiilasha iyo gabdhaha ardada ah ee ay iskuullada uga xirmeen weerar, adeegsi milateri ama amni darrada guud ee ka jirta deegaanka?

✓ **Talo**: Sida ugu macquulsan u diyaari ama u taageer samaynta **qorshaha suuraglnimada** si loo xaqiijiyo in waxbarashada ay sii socoto ka dib weerarrada ama adeegsiga milateri ee lagula kaco xarumaha waxbarashada. Ka baaraandeg qorshayaal kumeelgaar ah oo ku aaddan **qaababka lagu heli karo waxbarasho bedel ah**, sida goobo kale oo ay waxbarashada ka sii socon karto, iskuullada xagaaga, fasallada gelinka dambe iyo goobo si kumeelgaar ah wax loogu barto. Waa in qorshaha lagu daro tallaabooyin **lagu yareynayo suuragalnimada cawaaqibka aan ula kaca ahayn** (tusaale ahaan xisadda ka dhex dhalan karta dadka soo barakacay iyo kuwa deegaanka), iyo dowrka ay yeelanayaan hay'adaha hawlwadaaga ah, sida kuwa khibradda u leh fulinta waxbarashada bedelka ah. Xaqiiji in baahida kala duwan ee ragga iyo dumarka lagu daray qorshayaashan.

✓ **Talo**: Waa in la xaqiijiyo in dhammaan hawlaha la xiriira waxbarashada ay waafaqsan yihiin Heerarka Ugu Yar Waxbarashada ee ay diyaarisay Shabakadda Hay'adaha Waxbarashada Xaaladaha Degdega ah, kuwaasoo ah heerarka caalamka laga aqoonsan yahay ee waxbarashaa goobaha ay xasaraduhu ka taagan yihiin.[34] Xaqiijinta in hawlaha bani'daannimada iyo kuwa hormarinta ay ku salaysan yihiin heerarkan caalamiga ah ayaa xoojinaysa isku xirka, taageeridda qorsheyn wanaagsan iyo ka jawaabcelinta dhibaatooyinka waxbarashada. Si loo helo badqab hormarsan, waa in la hirgeliyaa talooyinka isbahaysiga GCPEA ee ku xusan daabacaaddiisa "Waxyaabaha ay Iskuullada Samayn Karaan Si ay Waxbarashada Uga Difaacaan Weerarrada iyo U Adeegsiga Ujeedooyinka Milateri" iyo tan kabaysa ee "Hagaha Farsamada: Waxyaabaha ay Macallimiinta iyo Maamullada Iskuullada Samayn Karaan Si ay Waxbarashada Uga Difaacaan Weerarrada."

☐ Haddii ay dalkaaga **toos u saamaysan colaad hubaysan**, side lagu gaaraa go'aanka **xiridda ama dib u furidda** xarumaha waxbarashada ee goobaha ay dagaalladu ka socdaan?

✓ **Talo**: Xaqiiji inuu jiro **hannaan digniin xilli hore ah** oo heer iskuul iyo mid bulsho ah, kaasoo lagu hubinayo in xarumaha waxbarashada ee ku yaal goobaha khatarta ugu jira weerarrada si badqab ah loo daadgureeyo xilliga ku haboon.

✓ **Talo**: Xaqiiji in **go'aannada dib loogu furayo** xarumaha waxbarashada ee ku yaal goobaha khatarta ah ay ku salaysan yihiin qiimeyn wanaagsan oo lagu sameeyay badqabka iyo ammaankooda (gaar ahaan xaqiijinta in xarumaha iyo wadooyinka loo maraba laga sifeeyay walxaha aan weli qarxin) iyo in dhinacyada ku lugta leh colaadda lagala xaajoodo xaqiijinta jawi ammaan ah oo ay iskuullada dib ugu furmi karaan (tusaale ahaan ayadoo laga xaajoonayo hab dhaqanka wanaagsan).

☐ Ma jiraan **siyaasado, qorshayaal ama istaraatijiyado la xiriira waxbarashada oo ah heer qaran, gobol ama caalami,** kuwaasoo lagu dari karo **ka difaacidda waxbarashada weerarrada ku yimaada iyo sidii ay tacliinta u socon lahayd xilliyada colaadda?** Qorshayaashaasi ma leeyihiin **hannaanka waxbarashada la jaanqaadi karta colaadda**?

✓ **Talo**: Xaqiiji in falanqeynta lagu samaynayo caqabadaha haysta waxbarashada lagu daro **saamaynta dhabta ah iyo tan uga iman karta colaadda** (tusaale ahaan dayactirka iyo dib u dhiska iskuullada ku waxyeeloobay dagaallada, bedel u samaynta qalabka waxbarasho ee lumay), waana in la tixgeliyo qiimaha fulinta tallaabooyinka badqabka hormarsan iyo barnaamijyada waxbarasho la jaanqaadi karta colaadda.

✓ **Talo**: Samee **siyaasado, qorshayaal iyo barnaanij** la jaanqaadi kara colaadda, kuwaasoo looga gol leeyahay in lagu yareeyo khatarta ka dhalan karta dagaallada mustaqbalka, ayadoo si siman beelaha oo dhan looga qeybgelinayo dhammaan heerarka waxbarashada, luuqada wax lagu barto iyo shaqaaleynta; iyo manhaj nabada hormariya; gaar ahaan mashaariicda xoojinta ammaanka xarumaha waxbarashada ee ku yaal goobaha khatarta ah ee ay fuliso ama taageerto dowladdaada.

[34] Shabakadda Hay'adaha Waxbarashada Xaaladaha Degdega ah, Heerarka Ugu Yar Waxbarashada: Diyaargarowga, Jawaabcelinta, Soo Kabashada, New York, daabacaada labaad. 2010 (waxaa la eegay 15-kii July 2016)

- ✓ Ma jiraan **caqabado dhanka maamulka ah** oo dadka qaar ka horjoogsanaya inay ku biiraan nidaamka rasmiga ah ee waxbarashada? (tusaale ahaan, aqoonsi la'aanta tacliintii hore ama waxbarashada aan rasmiga ahayn; shuruud ah in la keeno dukumiintiyada iskuulkii hore; warqadaha dhalashada; in qofka waxbarashada loogu diido da'diisa awgeed, gaar ahaan xaaladaha ay waxbarashada hakad u gashay colaadda awgeed)
- ✓ **Talo**: **Wax ka qabo caqabadaha waxbarashada,** tusaale ahaan: ayadoo meesha laga saarayo hannaanka kala sooca ku dhisan ee diiwaangelinta, xareynta ama qalinjabinta, iyo in la aqoonsado, shahaadooyin u dhigmana la siiyo barnaamijta waxbarashada qaxootiga; ayadoo la hirgelinayo hannaan lagu xaqiijinayo guulaha waxbarasho ee ay ardada ka gaareen dalalka kale, tusaale ahaan ardada qaxootiga ah ama kuwa soo laabtay; ama in xal loo helo caqabadaha dhanka maamulka ah ee ku gudban diiwaangelinta ardada.
- ✓ **Talo**: Guud ahaan, **dib-u-eegis ku samee siyaasadaha iyo barnaamijta la xiriira waxbarashada** ee sida tooska ah ama sida dadban uga qeyb qaadan kara difaaca waxbarashada, **adigoo kala tashanaya saamileyda ay khuseeyaan,** sida kuwa taabanaya luuqada wax lagu barto, aqoonsiga imtixaanaadka, qorashada macallimiinta, xulashada, mushaar siinta, ama manhajka, buuggaagta, iyo qalabka kale ee waxbarashada, si loo xaqiijiyo inay **si wax ku ool ah gacan uga geystaan helitaanka waxbarashada**.

## Tusaalooyin

### Midowga Afrika: Ka difaacidda waxbarashada ee weerarrada iyo tacliin colaadda la jaanqaadi karta, Istaraatijiyadda Waxbarasho ee Qaaradda Afrika 2016-2025

"Sanadahii dambe, qaaradda Afrika waxaa ka dhacay weerarro aad u xun oo lala beegsaday iskuullada iyo jaamacadaha, si gaar ahna ay u fuliyeen ururada xagjirka ah. Weerarradaasi iyo weliba u adeegsiga iskuullada iyo jaamacadaha ujeedooyin milateri ayaa khatar weyn geliya ammaanka ardada iyo macallimiinta, waxaana ay burburiyaan goobaha waxbarashada ee tira ahaanba yar. Waxay dhaliyaan in arday badan ay ka haraan waxbarashada, kuwo yar ay iskuullada ku biiraan, iyo hoos u dhac ku yimaada tayada waxbarashada iyo natiijada. Gabdhaha ayay si gaar ah u taabataa dhibaatadan, maadaama ay uga sii darto caqabadaha ka haysta helitaanka waxbarashada ee goobaha ay colaaddu ka jirto. Waxaa muhiim ah in iskuullada iyo jaamacadaha laga difaaco weerarrada iyo in loo adeegsado ujeedooyin milateri, si loo xaqiijiyo in waxbarashada ay sii socoto xilliyada colaadda iyo marxaladda ka dambeysaba. [...]

Ujeedada gaarka ah 10 – Hormarinta waxbarashada nabada, ka hortagga iyo xallinta colaadda ee dhammaan heerarka waxbarashada iyo da' kasta:

a. Diyaari siyaasado qaran oo ku aaddan waxbarashada nabada ayna ku lug leeyihiin wasaaradaha ay khuseyso iyo weliba wakiilo ka socda bulshada rayidka ah iyo kooxaha kale ee ku dhisan qiyamka Afrikaanka iyo qaababka ka hortagga iyo xallinta colaadaha

b. U tababar macallimiinta, shaqaalaha bulshada, wakiillada ururada diiniga ah iyo bulshada rayidka si ay qeyb uga noqdaan nabada iyo dhex-dhexaadinta

c. Samee, isla markaana faafi macluumaadka baridda iyo barashada ku aaddan waxbarashada nabada, isla markaana tababar khuseeya ka samee iskuullada, xarumaha tababarka, jaamacadaha iyo xarumaha dadka waaweyn wax lagu baro

d. Ka faa'iideyso khibradda laga helay hannaanka nabadeynta hal abuurka leh ee ka socda dalal kala duwan oo Afrika ah, si aad u faafiso casharada laga bartay

e. Dib-u-xoojin ku samee hannaanka tayada waxbarashada nabada ee dalalka kala duwan, kaasoo ah waxqabad iyo qaab lagu samayn karo dood siyaasadeed iyo isweydaarsi dhanka khibradaha ah." [35]

[35] Midowga Afrika. Istaraatijiyadda Waxbarashada Qaaradda Afrika 2016-2025, Janaayo 2016 (waxaa la eegay 15-kii July 2016) bogga 14.
Madaxda dalalka Midowga Afrika ayaa Janaayo 2016 meelmariyay Istaraatijiyadda Waxbarashada Qaaradda Afrika 2016-2025, oo ah nidaam lagu bedelayo hannaanka waxbarashada iyo tababarka ee Afrika, si waafaqsan Yoolka 4 ee Hormarka La Joogteyn Karo. Tiirarka istaraatijiyadda ayaa waxaa ka mid ah in waxbarashada ay hesho jawi ammaan ah, waxaana si gaar ah caqabadaha arintaasi ku gudban loogu tilmaamay weerarrada iyo u adeegsiga ujeedooyinka milateri ee xarumaha waxbarashada. Istaraatijiyadda ayaa waxaa sidoo kale ka mid ah ujeedo gaar ah oo ku aaddan hormarinta waxbarashada nabada, ka hortagga iyo xallinta colaadaha ee dhammaan heerarka tacliinta. Dalalka xubnaha ka ah Midowga Afrika ee ansixiyay Bayaanka Badqabka Iskuullada ayaa dowr muhiim ah ka ciyaaray sidii arimahaasi loogu dari kahaa Istaraatijiyadda.



### Falastiin: Adeegsiga xeeladaha yareynta musiibooyinka si loo difaaco iskuullada, ardada, iyo macalliinta marinka Gaza ku wajahaya khatarta weerar

"Sanadkii 2011, Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare ayaa kaashatay hay'adda UNESCO si ay Gaza uga fuliso Barnaamijka Yareynta Musiibooyinka kaasoo looga gol lahaa in iskuullada nugul laga dhigo kuwo ammaan ah ayadoo la adeegsano qaabab la isu geeyay. Wasaaradda ayaa si gaar ah u adeegsatay mabda'a iyo ficilka wanaagsan ee yareynta khatarta musiibada ee xaaladaha colaadda, gaar ahaan tan ka jirta Gaza. Waxaa ka mid ahaa tababarka hawlwadeennada waxbarashada. Mawduucyada tababarka waxaa ku jiray:

- Adeegsiga Heerarka Ugu Hooseeya ee Waxbarashada Xaaladaha Degdega ah ee INEE;
- Fulinta taageerada maskaxeed, gaar ahaan: ciyaaraha, muujinta dareenka iyo xirfadaha noolasha;
- Wax ka qabashada xaaladaha degdega ah;
- Isu diyaarinta xaaladaha aan la hubin;
- Fulinta gargaarka degdega ah (ayadoo la kaashanayo Bisha Cas);
- Garashada iyo wax ka qabashada walxaha laga shakiyo;
- Deminta dabka;
- Garashada iyo wax ka qabashada khatarta korontada;
- Isu diyaarinta difaaca madaniga ah;
- Qaadashada iyo adeegsiga qalabka badbaadada (sida dab demiska, matoorrada korontada dhaliya, makarafoonnada, dareeska xubnaha guddiga badbaadada, qalabka digniinta si iskuulka loogu wargeliyo weerar kusoo wajahan); iyo
- Adeegsiga qaabka digniinta ee fariinta gaaban.

Arinta kale ee looga hadlay barnaamijkaasi ayaa ahayd aqoonsiga iyo taageeridda istaraatijiyadaha maxalliga ah ee lagu difaacayo waxbarashada, sida kuwa soo socda:

- Waalidiinta oo subixii waca macallimiinta si ay u ogaadaan in wadada loo marayo iskuulka ay ammaan tahay;
- Carruurta oo adeegsada wadooyin la isla ogyahay marka ay tagayaan ama kasoo laabanayaan iskuulka;
- In iskuullada khatarta ugu jira weerarka aan loo adeegsan in lagu qaado imtixaannada sanad dugsiyeedka; iyo
- In carruurta laga joojiyo ka qeybgalka arimaha sida weyn u muujin kara (sida tartannada ciyaaraha ee ka dhaca goobaha bannaan, iwm) kuwaasoo usoo jiidi kara weerarr." [36]

[36] Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada, Waxyaabaha ay Wasaaradaha Waxbarashada Samayn Karaan Si ay Waxbarashada Uga Difaacaan Weerarrada iyo in Iskuullada Loo Adeegsado Ujeedooyin Milateri: Liiska Waxqabadka, 2015, bogga 22

### Soomaaliya: Adeegsiga waxbarashada raadiyaha lagu gudbiyo

"Waxbarashada raadiyaha lagu gudbiyo ayaa u wanaagsanaan karta deegaannada aan dhaqaalaha fiican haysan, ammaankuna ku yar yahay. Mashruuca waxbarashada raadiyaha lagu gudbiyo ee Xarunta Hormarinta Waxbarashada (EDC) ay Soomaaliya ka fulisay intii u dhexeysay 2009 ilaa 2011, ayaa si joogta ah dadka ugu gudbinayay barnaamijyo ku saabsan qoraalka, aqrinta, xisaabta, xirfadaha noolasha, caafimaadka iyo ka hortagga colaadaha. Barnaamijtaasi oo maalin kasta socon jiray 3 saacadood ayaa todobaadkii shan maalmood laga baahin jiray mowjad FM ah, ayagoo gaari jiray qiyaastii in ka badan 300,000 oo canug. Waxaa casharrada bixinayay macallimiin maxalli ah. Sidoo kale, macallimiinta ayaa loo tababaray habka waxbarashada raadiyaha lagu gudbiyo, sida waxqabadka, sheekooyinka iyo heesaha laga baahin karo raadiyaha. Ka dib markii uu dhammaaday mashruucaasi sanadkii 2011, ayaa xarunta EDC waxa ay heshiis la gashay wasaaradaha waxbarashada ee Somaliland, Puntland, Koonfurta iyo Bartamaha (federaalka) iyo hay'ado kale, kuwaasoo ay u fasaxday inay adeegsadaan barnaamijtaasi iyo macluumaadkooda. Sida ay sheegtay xarunta EDC, wasaaradahaasi ayaa sii waday fulinta mashruuca." [37]

### Nigeria: Waxbarasho bedel ah oo loo fidiyo carruurta ku barakacday colaadda

"Wakiilka Gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsan waxbarashada caalamiga ah, Gordon Brown, iyo ganacsato Nigerian ah oo ka jawaabayay weerarrada ka dhanka ah waxbarashada ee ka dhaca gobollada waqooyi ee Nigeria (sida Adamawa, Borno, iyo Yobe) ee 2012 uu billaabay ururka Boko Xaraam, ayaa sanadkii 2014 ku dhawaaqay Hindisaha Badqabka Iskuullada (SSI). Si loo joogteeyo helitaanka waxbarashada ee carruurta ka barakacay colaadda ka taagan gobolladaasi, ayaa hay'adaha hawlwadaaga la ah SSI (sida DFID, UNICEF iyo wasaaradda waxbarashada) waxa ay sanadkii 2015 ka baaraandageen suuragalnimada fulinta dhowr tallaabo oo ay ka mid yihiin:

- In iskuullada deegaanno ammaan ah loo bedelo ardada dugsiyada sare ee meelaha ay colaaddu ka jirto;
- In kulamo xasaasi ah lala yeesho bulshooyinka deegaanka si loo ogaado awoodda ay u leeyihiin qaabilaadda ardada soo barakacday;
- In ardada soo barakacday lagu biiriyo barnaamijta caadiga ah ee iskuullada bulshada martigelisay;
- In iskuullada ay yeeshaan laba gelin, isla markaana la qoro macallimiin dheeraad ah;
- In iskuullo kumeelgaar ah laga sameeyo xeryaha barakacataasha gudaha ; iyo
- In si kooban loo bixiyo teendhooyin iyo qalabka waxbarashada si loo dhiirageliyo in ardada ay ku biiraan, kana sii mid ahaadaan waxbarashada xeryaha barakacayaasha gudaha." [38]

### Nigeria: Bayaanka Agaasimaha Waxbarashada ee Wasaaradda Gaashaandhigga ee Shirka Badqabka Iskuullada ee Buenos Aires

"Nigeria waxa ay qorsheyneysaa inay diyaariso siyaasad qaran oo ku aaddan Badqabka Iskuullada si la isugu keeno dhammaan dhinacyada ay khuseyso arintan isla markaana loo meelmariyo *Tilmaamaha*. Tani waxay ka dhigan tahay in la xaqiijiyo in dhammaan saamileyda, sida wasaaradda gaashaandhigga, wasaaradda federaalka ee waxbarashada iyo tan arimaha dibedda ay og yihiin waajibaadka iyo mas'uuliyadda ka saaran ka difaacidda weerarrada ee waxbarashada Nigeria. Sidaa awgeed, guddiga Nigeria u qaabilsan waxbarashada xaaladaha degdega ah ayaa la saaray mas'uuliyadda ah inuu warqad u qoro wasiirka waxbarashada si dhammaadka sanadka loo yeesha kulanka Golaha Qaran ee Waxbarashada, kaasoo ah kan ugu sarreeya ee sameeya siyaasadaha waxbarashada Nigeria. Tani waxa ay xaqiijin doontaa in si buuxda Nigeria looga hirgeliyo Bayaanka Badqabka Iskuullada. […]

[37] Kor lagu xusay, bogga. 18.
[38] Kor lagu xusay, bogga. 19.



Ugu dambeyn, waxaa jira qorshayaal ay wadaan wasaarada gaashaandhigga iyo maamullada gobollada Nigeria, kuwaasoo dib-u-eegis loogu samaynayo go'aannada lagu adeegsanayo, milateriga ay ku degi karaan ama xarun hawgal uga samayn karaan iskuullada, ayadoo la raadinayo goobo bedel u noqon kara. Si kastaba, ardada ay colaaddu saamaysay ayaa loo wareejiyay iskuullo kale, ayadoo la raacayo Barnaamijka Bedelka Ardada ee gobollada Adamawa, Borno iyp Yobe. Ilaa iyo hadda, 2,400 oo arday ayaa loo qeybiyay 43 ka mid ah kuleejooyinka federaalka ee Waqooyiga Nigeria. Marka la eego dadaalladaasi oo dhan, Nigeria ayaa go'aansatay meelmarinta Bayaanka Badqabka Iskuullada."[39]

### Nepal: Wadaxaajoodka habka difaaca iskuullada

"Waxaa mudadii u dhexeysay 2000 ilaa 2003 xoogeystay olole ay hormuud ka ahaayeen hay'adaha UNICEF iyo World Education kaasoo ku aaddanaa badqabka iskuullada intii uu socday kacdoonkii ay jabhadda Maoist-ha ka waday dalka Nepal. Xubno ka tirsan bulshada, oo u badnaa dumar, ayaa loo tababaray inay dhammaan dhinacyada ku lugta leh colaadda keenaan miiska wadahadalka, isla markaana heshiis laga gaaro hab-dhaqanka lagu badbaadinayo iskuullada iyo in waxbarashada ay sii socoto xilliyada colaadda. Dhinacyada ku lugta lahaa wadaxaajoodkan ayaa kala ahaa ciidamada dowladda, fallaagada Maoist-ha, maamullada deegaanka, mas'uuliyiinta waxbarashada, booliska, ururada bulshada, wakiillo ka socda maamullada iskuullada iyo xisbiyada siyaasadda. Sidoo kale waxaa wadaxaajoodka goobjoog ka ahaa bulshada rayidka ah iyo warbaahinta maxalliga ah. Hab-dhaqanka lagu heshiiyay ayaa inta badan lagu dhajiyay albaabbada iskuullada. Hay'adda UNICEF ayaa samaysay hab-dhaqan tusaale ah; dhammaan iskuullada qeybta ka ahaa ololahana waxa ay qaateen guud ahaan qodobada ku qoran hab-dhaqankaasi:

Tusaalaha hab-dhaqanka iskuullada

1 Lama oggola in hub lala galo iskuullada.

2 Lama oggola in iskuullada lagu dhex qabto kulamo siyaasadeed ama waxyaabo kale oo aan ka mid ahayn barnaamijka waxbarashada.

3 Lama oggola in la xiro ama la afduubo qof ku sugan gudaha iskuulka.

4 Lama oggola in carruurta lagu dhibaateeyo gudaha iyo dibedda iskuullada.

5 Lama oggola in la farageliyo hawlaha waxbarashada ee caadiga ah. (Duqeyn, dhibaateynta macallimiinta, weerarrada ka dhanka ah iskuullada.)

6 Lama oggola in dharka iskuulka ama dhismihiisa loo adeegsado dagaallada.

7 Marnaba bartilmaameed looma tixgelin karo dhismaha iskuulka, looma adeegsan karo saldhig ciidan, dharka iskuulka looma adeegsan karo in la isku qariyo.

8 Waxaan ka codsaneynaa dhammaan dhinacyada, xooggaga ammaanka iyo kuwa Maoist-ha inay ilaaliyaan shuruucdan, ayna naga caawiyaan inaan iskuullada ka dhigno Goob Ammaan ah.

Istaraatijiyad taa la mid ah ayaa la adeegsaday intii uu socday ololihii 2004 ee "Kusoo Dhowaw Iskuulka" ee looga gol lahaa in sare loo qaado tirada gabdhaha iyo dadka la gacan bidixeeyo ee ku biiraya iskuullada. Ururada bulshada iyo macallimiin ayaa ka codsaday fallaagada Maoist-ha in ay taageerto ololaha ama aanay soo faragashan. Oloha ayaa gaaray 24,000 oo iskuul, waxaana uu dhaliyay in carruur ka badan 500,000 ay ku biiraan iskuullada."[40]

[39] Qeyb ka mid ah khudbaddii uu Agaasimaha Waxbarashada ee Wasaaradda Gaashaandhigga Nigeria ka jeediyay Shirka Badqabka Iskuullada ee Buenos Aires, Maarso 28-29, 2017.
[40] UNESCO, Ka Difaacidda Waxbarashada ee Weerarrada – Dib-u-eegis heer sare ah, 2010., bogga.267-268 (waxaa la eegay 15-kii July 2016).

## Macluumaad muhiim ah:

Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada, *Waxyaabaha ay Wasaaradaha Waxbarashada Samayn Karaan Si ay Waxbarashada Uga Difaacaan Weerarrada iyo in Iskuullada Loo Adeegsado Ujeedooyin Milateri*: Liiska Waxqabadka, 2015

Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada, *Waxyaabaha ay Iskuullada Samayn Karaan Si ay Waxbarashada Uga Difaacaan Weerarrada iyo in Loo Adeegsado Ujeedooyin Milateri*, 2016.

Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada, *Hagaha Farsamada: Waxyaabaha ay Macallimiinta iyo Maamullada Iskuullada Samayn Karaan Si ay Waxbarashada Uga Difaacaan Weerarrada,* 2017.

Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada, *Hagaha Fulinta Mabaadii'da Mas'uuliyadda Dalka Ka Saaran Ka Difaacidda Weerarrada Ee Waxbarashada Sare,* 2016.

Mac-hadka Caalamiga ah ee Qorsheynta Waxbarashada, *Hab-raaca qorsheynta iyo ka hagidda mas'uuliyiinta qorsheynta waxbarashada dhanka badqabka, adkeysiga iyo isdhexgalka bulshada*, 2015.

Mac-hadka Caalamiga ah ee Qorsheynta Waxbarashada, *Manhajka hab-raaca ee leh qaababka waxqabadka, istaraatijiyadda, iyo ka hagidda badqabka, adkeysiga iyo isdhexgalka bulshada ee qaabeynta manhajka, dib-u-eegistiisa iyo fulintiisa,* 2015

Education Above All, PEIC, Barashada Wada Noolaashaha: Waxbarashada Xallinta Colaadaha, Muwaadinnimo Mas'uuliyad Leh, Xuquuqda Aadanaha iyo Dhaqanka Bani'aadannimada, PEIC, 2013.

Inter-Agency Network for Education in Emergencies (INEE), *Heerarka Ugu Hooseeya ee Waxbarashada: Diyaargarow, Jawaabcelin, Soo Kabasho,* 2010

UNESCO, *Ka Difaacidda Waxbarashada ee Weerarrada – Dib-u-eegis heer sare ah*, 2010.



# 4. HORMARINTA IYO XOOJINTA TAAGEERADA SIYAASADEED EE SHIRARKA CAALAMIGA AH EE LAGU DIFAACAYO WAXBARASHADA XILLIYADA AY SOCDAAN COLAADAHA

- **In la taageero dadaallada Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ee ku aaddan carruurta iyo colaadaha hubaysan, wakiilka gaarka ah ee Xoghayaha Guud u qaabilsan arintaas, hay'adaha kale ee Qaramada Midoobay, iyo ururada; iyo**
- **in la yeesho kulamo joogta ah, la martiqaado hay'adaha caalamiga ah ee arimahaas ku hawlan iyo bulshada rayidka ah, si dib u eegis loogu sameeyo hirgelinta bayaankan, iyo adeegsiga tilmaamaha.**

Difaacidda waxbarashada xilliyada ay jirto colaadda hubaysan, oo ah waxa uu ka shaqeynayo Bayaanka Badqabka Iskuullada, ayaa xiriir gaar ah la leh nidaam ballaaraan oo ku aaddan ilaalinta carruurta ku nool goobaha colaadda oo ay dejisay Qaramada Midoobay.

Awoodda uu ku shaqeeyo Wakiilka Gaar ah ee Xoghayaha Guud u qaabilsan carruurta iyo colaadda ayaa waxaa 1997[41] go'aamiyay Golaha Loo Dhan Yahay ee Qaramada Midoobay, ka dib markii la ansixiyay daraasaddii ugu horreysay ee si qota dheer loogu sameeyay saamaynta ay colaadda hubaysan ku leedahay carruurta, taasoo ilmaha u aqoonsatay inay yihiin dhibbanayaasha ugu weyn ee colaadda.

Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ayaa sanadkii 1999 billaabay inuu si nidaamsan wax uga qabto arimaha la xiriira carruurta ku sugan goobaha ay colaadda ka jirto. Sanadkii 2005, Golaha Ammaanka ayaa sameeyay guddigii ugu horreeyay, ilaa haddana ah kan keliya ee hawshiisu tahay baaritaanka, ka hortagga iyo xoojinta isla xisaabtanka ku aaddan tacaddiyada waaweyn ee ka dhanka carruurta ku sugan goobaha ay colaadda ka jirto.[42]

Inkastoo uu yahay nidaam taageera dadaallada Qaramada Midoobay ay ku difaacayso carruurta ku sugan goobaha ay colaadda ka jirto, ayaa sidoo kale Bayaanka Badqabka Iskuullada waxa uu yahay mid ay ku wada shaqeeyaan, aragtidooda isku weydaarsadaan, isla markaana isu keena dalalka ay ka go'an tahay ilaalinta waxbarasada xilliyada ay jirto colaadda. Shirka Badqabka Iskuullada ee Oslo ka dhacay Mey 2015, isla markaana lagu soo bandhigay Bayaanka Badqabka Iskuullada, ayaa ahaa tallaabadii ugu horreysay ee lagu doonayay in dalal badan ay qeyb ka noqdaan dadaalka, isla markaana la helo taageero siyaasadeed iyo wada shaqeyn ku aaddan ilaalinta waxbarashada ee xilliya ay jirto colaadda.

## Su'aalaha Hagaya iyo Talooyinka

Hoos waxaa ku qoran liis dheer oo ah su'aalaha hagaya iyo talooyinka gacanta ka siin kara dalalka iyo saamileyda kale inay hawlgaliyaan ayna meelmariyaan go'aannada ku aaddan is dhaafsiga fikradaha iyo xoojinta taageerada siyaasadeed ee ilaalinta waxbarashada xilliyada ay jirto colaadda:

☐ Dowladdaadu miyay weligeed **shirarka caalamiga ah ee khuseeya** kusoo hadal qaaday ka difaacidda waxbarashada ee weerarrada iyo/ama in xarumaha waxbarashada aan loo adeegsan ujeedooyin milateri?

[41] Qaraarka Golaha Loo Dhan Yahay ee Qaramada Midoobay A/RES/51/77
[42] Qaraarka Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay 1612 (2005)

- ✓ **Talo**: **Si joogta ah uga hadal** arinta ka difaacidda waxbarashada ee weerarrada iyo in xarumaha waxbarashada aan loo adeegsadan ujeedooyin milateri, kuna soo qaad **shirarka ay khuseyso**, sida doodaha furan ee Golaha Ammaanka uu ka yeesho Carruurta iyo colaadaha ama difaaca dadka rayidka ah, adiga oo ka dhawaajinaya in dalkaaga uu **ansixiyay Bayaanka Badqabka Iskuullada isla markaana sheegaya tallaabooyinka waafaqsan ee uu qaaday,** iyo in aad ugu baaqdo dalalka kale inay ansixiyaan bayaanka. Ka feker sidii dalalka taageersan bayaanka ay wadajir ugu gudbin lahaayeen fikradaha noocaasi ah.
- ✓ **Talo**: Isku day in **dukumiintiyada laga xaajoonayo ee arinta khuseeya** aad ku **darto ama xoojiso,** adigoo kaashanaya dalalka aad isku fekerka tihiin, tixraacyo ku saabsan ka difaacidda waxbarashada ee weerarrada, in aan iskuullada loo adeegsan ujeedooyin milateri, iyo in waxbarashada ay sii socoto xilliyada ay colaaddu jirto.

---

☐ Dowladdaadu miyay dalalka ansixiyay bayaanka, kuwa danaynaya ama hay'adaha sida weyn ugu hawlan arintan u qaban-qaabisay ama kala qeyb qaadatay **doodaha ama feker isweydaarsiga ku aaddan Bayaanka Badqabka Iskuullada?**

- ✓ **Talo**: Si dhaw ula soco **tallaabooyinka ay qaaday dowladdaada** ka dib markii ay ansixisay Bayaanka Badqabka Iskuullada, tusaale ahaan, tixraaca Nidaamka Waxqabadka, la wadaagga khibradaada dalalka kale ee danaynaya bayaanka.
- ✓ **Talo**: Si muuqata **uga qeyb qaado ama u qaban-qaabi** kulamada feker isweydaarsiga ee dalalka ansixiyay bayaanka (ama dalalka danaynaya) ee ku aaddan tallaabooyinka la qaaday ka dib ansixinta Bayaanka Badqabka Iskuullada. Ka feker qaban-qaabinta shirka badqabka iskuullada, adigoo ergo ka keenaya dhammaan dalalka qeybta ka ah bayaanka iyo dhinacyada kale ee ay arinta khuseyso.
- ✓ **Talo**: Ku dar **kulamada laba geesoodka ah** ee aad dalalka kale la yeelanayso macluumaad ku saabsan Bayaanka Badqabka Iskuullada iyo *Tilmaamaha ka Hortagga in Ciidamada ay Iskuullada iyo Jaamacadaha Adeegsadaan Xilliyada Dagaalladu Socdaan*.

---

☐ Dowladdaadu miyay **taageero dhaqaale ama mid siyaasadeed u fidisay hawlaha Qaramada Midoobay** ee ku aaddan wanaajinta difaaca carruurta ku sugan goobaha colaadda?

- ✓ **Talo**: Taageer oo si buuxda u ilaali awoodda uu leeyahay **Wakiilka Gaarka ah ee Xoghayaha Guud u qaabilsan Carruurta iyo Colaadaha,** tusaale ahaan, adigoo samaynaya ama ka qeyb galaya urur aan rasmi ahayn sida "Kooxda Saaxiibadda Carruurta iyo Colaadaha" ama dowr muhiim ah ka cayaaraya kulamada lagu cusboonaysiinayo awoodda wakiilka ee saddexdii sanaba mar ka dhaca Golaha Loo Dhan Yahay ee Qaramada Midoobay.
- ✓ **Talo**: Haddii dalkaaga uu xubin ka yahay Golaha Ammaanka:
  - ✓ **Dowr muhiim ah ka qaadi** guddiga Golaha Ammaanka u qaabilsan Carruurta iyo Colaadaha.
  - ✓ Taageer in **awood gaar ah oo ku aaddan ilaalinta carruurta** la siiyo hawlgallada nabad ilaalinta Qaramada Midoobay ee la ansixiyo ama la cusboonaysiiyo inta aad xubinta ka tahay Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay.
- ✓ **Talo**: **Taageero dhaqaale** ku bixi fulinta hannaanka MRM ee tacaddiyada ba'an ee ka dhanka ah carruurta, ee ay sida wadajirka ah u wadaan Wakiilka Gaarka ah ee Xoghayaha Guud u qaabilsan Carruurta iyo Colaadaha, UNICEF, iyo Waaxda Qaramada Midoobay u qaabilsan Hawlgallada Nabad Ilaalinta.





## Tusaalooyin

### Argentina: Martigelinta Shirka labaad ee caalamiga ah ee Badqabka Iskuullada

"Jamhuuriyadda Argentina waxaa sharaf u ah inay martigeliso Shirka Labaad ee Caalamiga ah ee Badqabka Iskuullada, kaasoo abuuraya jawi lagu xoojin karo go'aannada ku aaddan Bayaanka Badqabka Iskuullada, iyo in si buuxda loo hirgeliyo *Tilmaamaha ka Hortagga in Ciidamada ay Iskuullada iyo Jaamacadaha Adeegsadaan Xilliyada Dagaalladu Socdaan*, ee lagu ansixiyay Shirka Koobaad ee Caalamiga ah ee Badqabka Iskuullada, kaasoo Mey 2015 ka dhacay Oslo.

Xaaladaha adag ee ka jira caalamka ayaa nagu qasbaya inaan ka fekerno sidii aan uga hortegi lahayn in xasaradaha siyaasadeed iyo kuwa bani'aadannimo ay saamayn xun ku yeeshaan wanaaga iyo mustaqbalka dadka. Xaaladahaasi ayaa sidoo kale noo muujinaya inaan u baahannahay wax ka qabashada dhibaatooyinka ay wajahayaan bulshooyinka rayidka ah, gaar ahaan carruurta iyo dhalinyarada oo ah dhibbanayaasha ugu badan ee colaadaha hubaysan. Marka iskuullada loo adeegsado ujeedooyin milateri, ayaa dhibaatada ugu yare e soo gaari karta carruurta iyo dhalinyarada waxa ay tahay inay hakad ka gasho waxbarashada iyo saamaynta kale ee la socota. Balse waxa ugu daran ee carruurta ku dhici kara ayaa ah inay wax ku bartaan goob ah kula sugan yihiin ciidamo hubaysan, kuwaasoo u keeni kara dhibaatooyin ay ka mid yihiin qalalaaso, qorasho qasab ah, tacaddiyo galmo, ka ganacsiga dadka, iyo khatarta kale ee jirta xataa marka a ciidamada dowladda ama ku aan dowliga ahayn ay ka guuraan xarunta waxbarashada. Tusaale ahaan, miinooyinka iyo walxaha aan weli qarxin ee goobta looga tago.

Ka hortagga in iskuullada loo adeegsado ujeedooyin milateri iyo joogteyta waxbarashada ayaa dhimi kara saamaynta maskaxeed ee uu dagaalka ku leeyahay carruurta, waxaana ay ka caawin karaan carruurta iyo dhalinyarada inay yeeshaan dareen caadi ah, inkastoo ay ku jiraan xaalad jahawareer ah, inay helaan meel ay uga gabbadaan gurka dhacaya, iyo tan ugu muhiimsan oo ah inay isu diyaariyaan mustaqbalka dib u dhiska bulshadooda marka ay colaadda dhammaato. [...]

Ayadoo qeyb ka ah ballanqaadkeena ku aaddan difaacidda xuquuqda aadanaha iyo xoojinta sharciga caalamiga ah ee bani'aadannimada, ayaa Argentina waxa ay soo jeedinaysaa inay martigeliso Shirka Labaad ee Caalamiga ah ee Badqabka Iskuullada oo ujeedadiisu tahay in dareenka caalamka lagu soo jeediyo khatarta ay leeyihiin weerarrada ka dhanka ah waxbarashada ee deegaannada ay colaadda ka jirto, lana qiimeynayo hormarka laga sameeyay ansixinta Bayaanka isla markaana la wadaagayo tusaalooyinka wanaagsan."[43]

### New Zealand: Bayaan lagu dhiiragelinayo taageeridda tilmaamaha ee Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay

"New Zealand waxa ay cambaareyneysaa in si ula kac loo beegsado iskuullada, macallimiinta iyo ardada, ama in goobaha waxbarashada loo adeegsado ujeedooyin milateri. Waa wax aan la aqbali karin in carruurta loo diido xaqa ay u leeyihiin waxbarashada, ama in qoysaska ay ka baqaan inay carruurtooda u diraan iskuulka. ... Ciidamada Difaaca New Zealand ayaa ku shaqeeya nidaam qaabaysan oo ku aaddan adeegsiga iskuullada, waxaana mabaadii'diisa waaweyn ka mid ah difaaca dadka rayidka ah iyo carruurta, iyo ilaalinta xuquuqda waxbarashada ee ay leeyihiin carruurta. New Zealand waxa ay taageersan tahay samaynta (...) *Tilmaamaha*, waxaana ay dalalka kale ku dhiiragelinaysaa inay sidoo kale sameeyaan."[44]

### Malaysia: Hadal lagu shaacinayo ansixinta Bayaanka Badqabka Iskuullada ee Golaha Ammaanka

"Waxaan si la mid ah dalalka kale uga walaacsannahay weerarrada sii badanaya ee ka dhanka ah iskuullada iyo cisbitaallada, iyo u adeegsiga ujeedooyinka milateri ee ay ciidamada dowladaha iyo kuwa aan dowliga ahayn kula kacaan iskuullada, taasoo sababta in kumannaan carruur ah ay heli waayaan waxbarasho iyo daryeel caafimaad. Anaga oo ka duulayna baaqa Golaha Ammaanka ee ku xusan qaraarrada kala ah 1998 (2011) iyo 2143 (2014), kuna

---

[43] Khudbaddii furitaanka shirka ee uu jeediyay danjire Pedro Villagra Delgado, wasiir ku xigeenka arimaha dibedda ee Jamhuuriyadda Argentine, ahaana madaxa iyo gudoomiyaha Shirka Badqabka Iskuullada ee Buenos Aires, 28-kii Maarso 2017 (Waxaa tarjumay GCPEA)
Shirka Badqabka Iskuullada ee Buenos Aires ayaa dhacay 28-29 Maarso 2017. Waxaa si wadajir ah u martigeliyay wasaaradaha gaashaandhigga iyo arimaha dibedda ee Jamhuuriyadda Argentine, waxaana kasoo qeybgalay in ka badan 250 ergo oo ka socday 85 dal iyo tiro hay'ado isugu jiro heer caalami, gobol iyo kuwo aan dowli ahayn.

[44] Kulankii 7259[aad] ee uu yeeshay Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay, Diiwaanka Kulanka, September 8, 2014 (S/PV.7259) (waxaa la eegay 15-kii July, 2016).

aaddan ka difaacidda iskuullada ee weerarrada iyo in ujeedo milateri loo adeegsado, ayaa waxaan ku faraxsanahay inaan shaaciyo in Malaysia ay taageersan tahay Bayaanka Badqabka Iskuullada ee Oslo lagu ansixiyay 29-kii Mey 2015. Waxaan ugu baaqaynaa dhammaan dalalka inay tixgeliyaan ansixinta bayaanka, kaasoo looga gol leeyahay in kor loogu qaado wacyiga iyo dhaqanka wanaagsan ee looga hortagi karo in xarumaha waxbarashada loo adeegsado ujeedooyin milateri xilliyada ay socdaan colaadaha, isla markaana ay iskuullada ahaadaan goob wax lagu barto oo aan dhiig lagu daadin.” [45]

### Nigeria: Hadal lagu muujinayo ansixinta Bayaanka Badqabka Iskuullada ee Golaha Ammaanka

“Anaga uu muujinayna go’aankeena qaran ee ku aaddan wanaajinta carruurta, ayaa Nigeria waxa ay ka mid ahayd dalalka ugu horreeyay ee ansixiya Bayaanka Badqabka Iskuullada ee 29-kii Mey lagu saxiixay Oslo, Norway. Bayaankan ayaa kab u noqonaya oo xoojinaya Hindisaheenna Qaran ee Badqabka Iskuullada ee la sameeyay 2014, isla markaana qeyb ka ah siyaasadda ay dowladda federaalka ah ku hormarinayso deegaannada ammaanka ee waxbarashada. *Tilmaamaha* ka Hortagga in Ciidamada ay Iskuullada iyo Jaamacadaha Adeegsadaan Xilliyada Dagaalladu Socdaan ayaa jiheyn doona dadaalka ku aaddan ka guulgaaridda ujeedadan. Waxaa naga go’an inaan faafinno tilmaamahan, iyo inaan ka shaqeyno hirgelintooda. Waxaan si dhab ah ugu qanacnay in hindisahan uu hormarin doono isla markaana difaaci doono xuquuqda waxbarashada iyo ka hortagga inay tacliinta joogsato xilliyada ay colaaddu jirto.” [46]

### Midowga Afrika: Baaq ah in Golaha Ammaanka iyo Nabada ee Midowga Afrika uu taageero tilmaamaha

“Golaha waxa uu ugu baaqayaa dhammaan dalalka xubnaha ka ah ee ay colaadda ka jirto inay u hoggaansamaan Sharciga Caalamiga ah ee Bani’aadannimada iyo inay xaqiijiyaan in iskuullada aan loo adeegsan ujeedooyin milateri. Golaha waxa uu soo dhaweynayaa tallaabooyinka ay qaadeen qaar ka mid ah dalalka xubnaha ka ah, kuwaasoo lagu hormarinayay, laguna difaacayay xuquuqda ay carruurta u leeyihiin waxbarashada iyo in la fududeeyo sii socoshada tacliinta ee xilliyada ay colaadu jirto. Sidaa awgeed, Golaha waxa uu bogaadinayaa shan iyo tobanka (15) dal ee xubnaha ka ah Midowga Afrika ee kala ah: Jamhuuriyadda Bartamaha Afrika, Chad, Cote d’Ivoire, Kenya, Liberia, Madagascar, Mozambique, Niger, Nigeria, Sierra Leone, Koonfur Afrika, Suudaanta Koonfureed, Soomaaliya, Sudan iyo Zambia, kuwaaso durbadiiba ansixiyay Tilmaamaha ka Hortagga in Ciidamada ay Iskuullada iyo Jaamacadaha Adeegsadaan Xilliyada Dagaalladu Socdaan, sidoo kalena loo yaqaan “*Tilmaamaha* Badqabka Iskuullada” waxaana uu ugu baaqayaa dhammaan dalalka kale ee aan weli sidaa samayn inay iyaguna ansixiyaan tilmaamaha. Golaha waxa uu sidoo kale hoosta ka xariiqay baahidda loo qabo xoojinta tilmaamaha, si loo xaqiijiyo in la adeegsan karo marxalad kasta.” [47]

### Sierra Leone, Zambia, iyo Norway: Taageeridda aqoon-isweydaarsi heer gobol ah oo ku aaddan hirgelinta tilmaamaha

Bishii Nofembar 2016, dalalka Sierra Leone, Zambia, iyo Norway ayaa wadajir u qabtay siminaar goboleed diiradda lagu saarayay meelmarinta *Tilmaamaha* ee dalalka ku jira Midowga Afrika. Wakiillo ka socday wasaaradaha gaashaandhigga iyo waxbarashada iyo ciidamada qaran ee 14 ka mid ah 17 dal ee Afrika ka ansixiyay tilmaamaha ayaa halkaa isugu tegay, waxaana ay isweydaarsadeen qaababka ku shaqeynta tilmaamaha iyo khibradaha ay ka dhaxleen.[48]

---

[45] Kulankii 7466[aad] ee uu yeeshay Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay, Diiwaanka Kulanka, June 18, 2015 (S/PV.7466) (waxaa la eegay 15-kii July, 2016).
[46] Kor lagu xusay.
[47] Kulankii 597[aad] ee Golaha Nabada iyo Ammaanka ee Midowga Afrika, 10-kii Mey, 2016, Warsaxaafadeed (PSC/PR/BR.(DXCVII)) (Waxaa la eegay 15-kii July, 2016).
Warsaxaafadeedka waxaa soo saaray Golaha Nabada iyo Ammaanka ee Midowga Afrika ka dib kulan furan oo uu yeeshay 10-kii Mey 2016, cinwaankiisuna ahaa: “Carruurta ku sugan goobaha colaadda ay ka jirto ee Afrika, gaar ahaan ka hortagga weerarrada lala beegsado iskuullada xilliyada ay dagaalladu socdaan”. Intii uu socday kulankaasi, ayaa dalalka Afrika ee horay u saxiixay Bayaanka Badqabka Iskuullada iyo kuwa danaynaya waxa ay muujiyeen muhiimadda ay leedahay in iskuullada laga difaaco in loo adeegsado ujeedooyin milateri, tilmaamaha iyo bayaankaba.
[48] Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada, *Warbixinta Siminaarka Addis Ababa ee xoojinta dowrka ay ciidamada qalabka sida ku leeyihiin ka hortagga weerarrada ka dhanka ah waxbarashada iyo in ciidamada ay iskuullada iyo jaamacadaha adeegsadaan xilliyada dagaalladu ka socdaan Afrika,* 2017.





# 5. ISLA XISAABTAN KU AADDAN WEERARRADA LAGU QAADO XARUMAHA WAXBARASHADA, ARDADA IYO SHAQAALAHA INTA AY COLAADDU JIRTO

- **In la baaro eedeymaha ku aaddan tacaddiyada, si ku haboonna loo maxkamadeeyo kuwa geystay ayadoo la adeegsanayo shuruucda qaran iyo kuwa caalamiga ah ee khuseeya.**

Hannaan isla xisaabtan wax ku ool ah ayaa muhiim ah si mustaqbalka looga hortago weerarro sharci darro ah ee xilliyada colaadda loo geysto xarumaha waxbarashada, ardada iyo macallimiinta. Sida ay sheegtay Wakiilka Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan carruurta iyo colaadaha, in lala xisaabtamo kuwa beegsanaya iskuullada ayaa ah qaabka ugu wanaagsan ee looga hortagi karo beegsiga xarumaha waxbarashada.[49]

Dowladdu waxa ay mas’uuliyad ka saaran tahay inay baarto tacaddiyada ka dhanka ah shuruucda dalka iyo kuwa caalamiga ah, ayna dadka lagu tuhunsan yahay dembiyadaasi horkeento cadaallada. Taliyayaasha ciidan waxa ay mas’uuliyad ka saaran tahay inay ka hortagaan tacaddiyada noocaasi, ayna xaqiijiyaan in askartooda ay ogyihiin waajibaadka saaran, ayna tallaabo edbin ama ciqaab ah ka qaadaan kuwa sharciga jabiya. Baarlamaanka dalka ayaa looga baahan yahay inuu diyaariyo xeer ciqaabeed wax ku ool ah oo lagula xisaabtamayo kuwa baalmara sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo kan bani’aadannimada.

Marka laga soo tago hannaanka isla xisaabtanka heerka qaran, waxaa jira dhowr nidaam oo caalami ah, kuwaasoo lagu xaqiijin karo u hogaansamidda shuruucda caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, bani’aadannimada iyo dembiyada. Waxaa ka mid ah heshiisyo caalami ah, guddiyo xaqiiqo raadin ah, kuwo xuquuqda aadanaha ah, maxkamado caalami ah oo gaar ah, iyo Maxkamadda Caalamiga ah ee Dembiyada.
Si looga hortago weerarrada ka dhanka ah xarumaha waxbarashada, ardada iyo shaqaalaha, waxaa loo baahan yahay in dalalka ay si wax ku ool ah u adeegsadaan isla markaana xoojiyaan hannaanka isla xisaabtanka.

## Su’aalaha Hagaya iyo Talooyinka

Hoos waxaa ku qoran liis dheer oo ah su’aalaha hagaya iyo talooyinka gacanta ka siin kara dalalka iyo saamileyda kale inay hawlgaliyaan ayna meelmariyaan go’aannada ku aaddan xaqiijinta isla xisaabtanka ee weerarrada ka dhanka ah xarumaha waxbarashada, ardada iyo shaqaalaha ee xilliyada colaadda.

☐ Ma jiraan **qodobo** ka mid ah shuruucda maxalliga, kuwa ciidamada qaranka, ama siyaasadaha hadda u yaalla milateriga, ee qaban kara ciidamada qalabka sida ee dalkaasi, kuwaasoo dhigaya in **aan si toos ah loo weerarri karin dadka rayidka ah**, isla markaana **aan cad loo beegsan karin hantida shacabka ee colaadaha caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ahba, haddii aanay goobahaasi ahayn kuwo loo adeegsanayo ujeedo milateri?**

✓ **Talo**: xaqiiji in **shuruucda iyo siyaasadaha** maxalliga ah ay sahlaan **nidaam baaritaan oo wax ku ool ah** oo ku aaddan eedeymaha weerarrada ka dhanka ah xarumaha waxbarashada, ardada iyo macallimiinta. Tixgeli in si *toos* ah loo mamnuuco weerarrada ka dhanka ah xarumaha waxbarashada ee khilaafsan sharciga caalamiga ah.

☐ Dowladdaadu **si dhab ah ma u maxkamadeysaa** dadka ku xadgudba shuruucda dhigaya in aan si toos ah loo weerarri karin dadka rayidka ah, isla markaana aan cad loo beegsan karin hantida shacabka ee colaadaha caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ahba, haddii aanay goobahaasi ahayn kuwo loo adeegsanayo ujeedo milateri?

---

[49] http://www.protectingeducation.org/news/accountability-best-defence-deterring-attacks-schools-leila-zerrougui

- ✓ **Talo**: xaqiiji in dowladdaada ay kiisaska geyso **maxkamadaha qaranka iyo kuwa milateriga**, ayna **la socoto u hogaansamidda sharciga**.
- ✓ **Talo**: xaqiiji in dowladdaada ay gacan ka geysato dadaallada kiisaska lagu geynayo **Maxkamadda Caalamiga ah ee Dembiyada**.

---

☐ Dowladdaadu miyay taageertaa **dadaallada lagu xoojinayo isla xisaabtanka caalamiga** ah ee weerarrada ka dhanka ah xarumaha waxbarashada, ardada iyo shaqaalaha xilliyada ay colaaddu jirto?

- ✓ **Talo**: xaqiiji in dowladdaada ay **taageerto tallaabooyinka isla xisaabtanka** caalamiga ah ee loo maro Maxkamadda Caalamiga ah ee Dembiyada, Guddiga Xuquuqda Aadanaha, Kooxda Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay u qaabilsan carruurta iyo colaadaha, Guddiyada dusha kala socda heshiisyada Qaramada Midoobay, sida Guddiga Xuquuqda Carruurta, kan xuquuqda dhaqaalaha, bulshada iyo dhaqanka, iyo wakiillada gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsan arimaha muhiimka ah, sida midka xuquuqda waxbarashada.

## Tusaalooyin

### Argentina: In si cad loogu xuso xarumaha waxbarashada eray bixinta dembiyada dagaalka

"Tacaddiyada waaweyn ee meel ka dhaca ku ah shuruucda iyo xeerarka loo adeegsado colaadaha hubaysan ee maxalliga ah, sida ku xusan nidaamka sharciga caalamiga ah…: In si ula kac ah loo weerarro dhismayaasha u gaarka ah…waxbarashada…haddii aanay ahayn goobo milater." [50]

### Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Congo: Maxkamadeynta dadka lagu eedeeyay inay geysteen weerarrada lagu qaaday xarumaha waxbarashada

"Ives Kahwa Panga Mandro ("Caaqil Kahwa"), asaasaha Xisbiga Midnimada iyo Ilaalinta Sumcadda Congo, ayaa sanadkii 2006 waxa ay Maxkamadda Milateriga ee Ituri ku heshay lix dembi oo uu ka mid yahay dembi dagaal oo ah inuu si ula kac ah u weerarray dhismayaal waxbarasho, ka dib weerar uu bishii Oktoobar 2002 ku qaaday iskuullo. Maxkamadda oo soo xigatay qodob ka tirsan dastuurka Jamhuuriyadda Dimqraadiga Congo oo u fasaxaya maxkamadaha madaniga ah iyo kuwa milateriga inay adeegsadaan shuruucda caalamiga ah, ayaa soo xigatay Axdiga Rome ee dembiyada dagaalka, gaar ahaan weerarrada ula kaca ah ee ka dhanka ah dhismayaasha u gaarka ah waxbarasha. Kahwa ayaa lagu xukumay 20 sano oo xabsi ah. Maxkamadda milateriga Ituri ayaa shan qodob ku salaysay go'aankeeda: (1) Dembiilaha uu weerarka qaaday; (2) in bartilmaameedka weerarka uu ahaa dhismo ama dhismayaal u gaar ah waxbarashada ama hawlaha kale ee la ilaaliyay ee ku xusan Axdiga (Kiiska Kahwa ayaa ahaa ugu yaraan laba iskuul); (3) in dembiilaha uu ula kac u beegsaday dhismaha, oo aan ahayn goob milateri; (4) in falkaasi uu dhacay xilli uu socday dagaal gudaha ah (maxalli ah); iyo (5) in dembiilaha uu ogaa xaaladda dhalisay colaadda hubaysan." [51]

### Maxkamadda caalamiga ah ee qaabilsan dembiyada Yugoslavia-dii hore: Dacwad kusoo oogidda dadka lagu eedeeyay inay geysteen weerarrada lagu qaaday xarumaha waxbarashada

"PASKO LJUBICIC ayaa ogaa ama haystay sabab uu ku ogaan karay in askar ka tirsan Guutadiisa 4-aad ee Milateriga Booliska ah, isla markaana uu taliyaha u ahaa ay fulin rabeen ama ayba fuliyeen burburin baahsan oo ka dhan ah hantida, ganacsiga, goobaha cibaadada iyo xoolo ay Muslimiinta Bosnia ku leeyihiin tuulooyinka Busovaca, Ahmici, Nadioci, Pirici, Loncari, iyo Ocenici, balse uu ku guuldaraystay inuu ka qaado tallaabooyinka macquulka ah ee loo baahnaa si looga hortago falalkaasi iyo inuu ciqaabo kuwa dembiga geystay, sidaa awgeed. […] falalkaasi ayaa ka

---

[50] Ministério de Defensa, https://issuu.com/ceepade/docs/manual_derecho_humanitario, 2010, bogga. 94 (Waxaa la eegay 15-kii July, 2016).
[51] Human Rights Watch, *Iskuullada iyo Colaadaha Hubaysan, Qiimeyn Caalami ah oo ku aaddan Shuruucda Maxalliga ah iyo Falalka ay Dowladda Iskuullada Kaga Difaacdo Weerarrada iyo in loo Adeegsado Ujeedooyin Milateri* July 20, 2011, bogga.44-45 (Waxaa la eegay 15-kii July, 2016).



dhigan in PASKO LJUBICIC uu galay: […] dembiga 12: burburinta xarumo gaar u ah diinta ama waxbarashada, taasoo MEEL KA DHAC KU AH SHARCIGA XEERARKA DAGAALKA, sida ku cad qodobada 3(d), 7(1) iyo 7(3) ee Axdiga maxkamadda gaarka ah; […]."[52]

### Guddiga Sheegashooyinka Eritrea iyo Itoobiya: Magdhaw ka bixinta weerarrada lala beegsado iskuullada

"Ka dib markii la ogaaday in Itoobiya ay fasaxday boob iyo gubitaan lagula kacay dhismayaal ku yaal magaalada Guluj intii u dhexeysay Mey iyo Juun 2000, ayaa Guddiga waxaa u caddaatay in Itoobiya ay mas'uul ka ahayd boqolkiiba 90 khasaaraha guud ee xilligaasi soo gaartay hantida Guluj. Eritrea oo ka duulaysa qiyaasta boqolkiiba 90 ayaa dalbatay magdhaw dhan 9,688,554 oo lacagteeda ERN ah iyo weliba 39,502 oo dollar kharashkaasi oo ah qiimaha 15 dhismo ama dhismayaal ku yaal Guluj sida: xarunta caafimaadka, makhaasiinka wasaaradda caafimaadka, xarunta maamulka gobolka, dhismaha xarunta degmada, saldhigga booliska, maxkamadda, xarunta biyaha, iskuullo, xarunta wasaaradda beeraha, xafiiska PFDJ ee heer gobol, xafiiska gaadiidka dhulka, xafiiska heer gobol NUEYS, xarumaha NUEYS, kaalimo shidaal iyo kaniisad catholic ah. Itoobiya ayaan jawaab gaar ah ka bixin sheegashada Eritrea ee ku aaddan dhismayaashaasi… Guddiga ayaa u go'aamiyay Eritrea magdhaw dhan 900,000 oo dollar, taasoo u dhiganta boqolkiiba 90 khasaaraha guud ee gaaray dhismayaasha kor lagu sheegay."[53]

"[…] Marqaatiyo ay fureen dad Itoobiyaan ah ayaa muujinaya in duqeyn xooggan loo geystay deegaanka Bure, halka mid taa ka yar ay ka dhacday Dalul Wereda. Caddeynta ayaa si guud u muujisay in duqeymahaasi ay ku burburtay hanti badan, gaar ahaan xarumo biyo, iskuullo iyo xarumo caafimaad oo ku yaal Bure iyo deegaannaada ku xeeran. Qiimeyn uu Sanduuqa Hormarinta iyo dib u dhiska bulshada ee Itoobiya (ESRDF) sameeyay Nofembar 2001 ayaa sidoo kale lagu sheegay burbur soo gaaray xarun caafimaad iyo laba iskuul oo ku yaal Bure iyo Manda, inkastoo aan warbixinta lagu sheegin inta uu gaarsiisan yahay burburka ka dhacay gobolkaasi… Ayadoo la tixgelinayo in khasaaraha ka dhashay tacaddiyada ay geysatay Eritrea aan la hubin, iyo in khasaaraha aanu xadgudub ku ahayn xeerarka dagaalka, ayaa magdhawga guud ee la saaray Eritrea kuna aaddan burburinta dhismayaasha iyo kaabayaasha guud ee khilaafsan xeerka dagaalka waxa uu noqday 3,500,000 oo dollar." [54]

### Maxkamadda caalamiga ah ee dembiyada: Aqoonsiga matalaad loo sameeyay iskuul la burburiyay oo qeyb ka ahaa kiiskii ka dhanka ahaa Thomas Lubanga

"Kiiska Maxkamadda Caalamiga ah ee Dembiyada ay u haysatay Thomas Lubanga, oo lagu eedeeyay inuu askar ka dhigtay carruur ka yar da'da 15, isla markaana uu dagaal galiyay, ayaa waxaa ka qeyb qaadanayay guud ahaan 99 dhibbane, kuwaasoo ay matalayeen todobo qareen. Qareennadaasi ayaa ku sugnaa maxkamadda, waxayna awoodeen inay su'aallo weydiiyaan marqaatiyaasha isla markaana ay maxkamadda usoo bandhigaan aragtida ay qabaan dhibbanayaasha. Waxaa dadkaasi dhibbanayaasha ah ka mid ahaa maamule iskuul, kaasoo loo arkay inuu laba jeer dhibban yahay; dhibaato soo gaartay qudhiisa (jirdil loo geystay xilli uu doonayay inuu joojiyo carruurta askar ahaanta looga qoranayo iskuulkiisa) sidoo kalena matalaya iskuulkiisa oo la burburay, isla markaana aan dib loo dhisin ilaa taariikhdu markay ahayd Janaayo 2009."[55]

---

[52] Maxkamadda caalamiga ah ee qaabilsan dembiyada Yugoslavia-dii hore (ICTY) *Dacwad oogaha iyo Pasko Ljubicic: Eedeymaha oo la saxay* (The Hague, September 26, 2000). Sidoo kale eeg Maxkamadda caalamiga ah ee qaabilsan dembiyada Yugoslavia-dii hore (ICTY), *Dacwad oogaha iyo Pavle Strugar, Milodrag Jokic, Vladimir Kovacevic,: Eedeymaha oo la saxay* (Maarso 31, 2003).
[53] Guddiga Sheegashooyinka Eritrea iyo Itoobiya, *Sheegashooyinka khasaaraha ee Eritrea, ee u dhexeeya Dowladda Eritrea iyo Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya.*
[54] Guddiga Sheegashooyinka Eritrea iyo Itoobiya, *Sheegashooyinka khasaaraha ee Eritrea, ee u dhexeeya Dowladda Eritrea iyo Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya. August 17, 2009.*
[55] Bede Sheppard, "'Xanuun badan oo wax carqaladeyna: Isla xisaabtanka weerarrada ka dhanka ah waxbarashada," UNESCO, Ka Difaacidda Waxbarashada ee Weerarrada – Dib-u-eegis heer sare ah, Febraayo 2010. Soo xiganaya Maxkamadda Caalamiga ah ee Dembiyada, Dacwad oogaha iyo *Thomas Lubango Dyilo*, ICC-01/04-01/05, Go'aanka ku aaddan Codsiga ah in Dhibbanayaasha ay ka Qeyb qaataan Dhagaysiga Dacwadda (Disembar 15, 2008), faqrada. 105-111. Sidoo kale eeg Maxkamadda Caalamiga ah ee Dembiyada, Dacwad oogaha iyo *Thomas Lubango Dyilo*, ICC-01/04-01/06-T-107-ENG ET WT, Arimaha Hannaanka (Kulan Furan) (Janaayo 26, 2009), bogga. 44-45. Sida ku xusan shuruucda hannaanka iyo caddeymaha ee Maxkamadda Caalamiga ah ee Dembiyada, ICC-ASP/1/3 (2002), dhibbanayaasha waxaa ka mid ah dadka caadiga ah iyo 'hay'adaha ama xarumaha ay dhibaatada tooska ah soo gaartay hantidooda loo asteeyay diinta, waxbarashada, fanka ama sayniska, ama arimaha samafaka, iyo taalooyiinka taariikhiga ah, cisbitaallada iyo goobaha kale ee loo adeegsado arimaha bani'adaannimada.'

**Maxkamadda Xuquuqda Aadanaha ee Yurub: Xukunka kiis khuseeyay weerarkii 2004 lagu qaaday iskuul ku yaal Beslan, Ruushka**

"Gaba-gabadii, maxkamadda waxaa u caddaatay in ugu yaraan dhawr maalmood ka hor inta uusan weerarka dhicin ay dowladda haysan xog ku filan qorshaha weerarka argagixiso ee lala damacsanaa goob ka tirsan degmada Malgobek ee gobolka Ingushetia, kaasoo xarun waxbarasho lagu beegsaday 1-dii Sebtembar. Xogta sirdoonka ayaa lagu sheegay in weerarka la qorsheynayay uu la mid ahaa kuwo waaweyn oo ay horay u geysteen gooni-u-goosatada Chechnya, kuwaasoo dhaliyay khasaaro ba'an. Khatarta noocaasi ah ayaa muujinaysa inay dhibaato weyn kusoo wajahan tahay noolasha shacabka, gaar ahaan kuwa nugul sida carruurta iskuulleyda ah iyo gaadiidkooda ee ka qeyb galayay dabaaldegga Maalinta Aqoonta ee halkaa ka dhacayay. Dowladda ayaa si buuxda u xakameyn kartay xaaladda, waxaana laga filayay inay qaado tallaabooyinka macquulka ah ee looga hortagi karay ama lagu dhimi karay khatartaasi. Inkastoo ay dowladdu tallaabooyin qaaday, waxaa si guud loo dhihi karaa in tallaabooyinka ka hortagga ee xaaladdaasi ay ahaayeen kuwo gaabis ah. Argagixisada ayaa awoodday inay kulmaan, isdiyaariyaan, safraan isla markaana qabsadaan bartilmaameedkooda, ayagoo aan la kulmin wax ka hortag ah oo uga yimid laamaha ammaanka. Ma jirin hay'ad sare oo mas'uul ka ah wax ka qabashada xaaladaha noocaasi, isla markaana awood iyo waqti ku bixisay difaaca qeybaha bulshada ee nugul iyo xaqiijisay inay xakameyso khatarta ama ay kala hadasho kooxaheeda deegaanka ku sugan.

Maxkamadda ayaa carrabka ku adkeysay in diyaarinta ka jawaab-celinta falalka khatarta ah ee sharciga ka baxsan ay tahay xaalad adag, isla markaana loo baahan yahay in laamaha ammaanka sida booliska ilaa xad loo oggolaado inay gaari karaan go'aan hawgal. Go'aannada noocaasi ah ayaa marwalba adag [...] balse waa in marka si wanaagsan looga baaraandego ay yihiin kuwo ka hortagi kara ama yareyn kara khatarta la ogyahay. Sidaa awgeed, marka laga hadlayo kiiskan ayaa maxkamadda waxa ay ogaatay in dowladda Ruushka ay ku guuldaraysatay qaadidda tallaabooyin noocaasi ah.

Xaaladda noocaasi ah, ayaa maxkamadda waxaa u caddaatay in lagu xadgudbay waajibaadka ku xusan Qodobka 2 [xaqa noolasha] ee Xeerka [Xuquuqda Aadanaha] ee [Yurub] marka laga hadlayo dhammaan dhinacyada uu khuseeyo kiiskan."[56]

## Macluumaad muhiim ah

Bede Sheppard, "'Xanuun badan oo wax carqaladeyna: Isla xisaabtanka weerarrada ka dhanka ah waxbarashada," UNESCO, Ka Difaacidda Waxbarashada ee Weerarrada – Dib-u-eegis heer sare ah, Febraayo 2010.

Kooxda Waxbarashada Caalamiga ah, *Difaacidda Waxbarashada Dalalka ay Colaaddu Saamaysay: Isla Xisaabtanka Sharci iyo Mas'uuliyadda Difaaca (Buugga 2)* Oktoobar 2012.

Human Rights Watch, *Iskuullada iyo Colaadaha Hubaysan, Qiimeyn Caalami ah oo ku aaddan Shuruucda Maxalliga ah iyo Falalka ay Dowladda Iskuullada Kaga Difaacdo Weerarrada iyo in loo Adeegsado Ujeedooyin Milateri,* July 2011.

PEIC, *Ka Difaacidda Waxbarashada ee Amni darrada iyo Colaadaha Hubaysan: Buugga Gacanta ee Sharciga Caalamiga ah*, 2014.

PEIC, *Waxbarashada iyo Sharciga Magdhawga Amni darrada iyo Colaadaha Hubaysan,* 2014.

[56] Maxkamadda Xuquuqda Aadana ee Yurub, *Kiiska Tagayeva iyo dadka kale ee ka dhanka ah Ruushka*, 2017, faqrada 491-493.



# LIFAAQYO
# BAYAANKA BADQABKA ISKUULLADA

Saamaynta ay colaadda hubaysan ku yeelato waxbarashada ayaa dhalisa caqabado waaweyn oo ah dhinacyada bani'aadannimada, hormarka iyo guud ahaan bulshada. Caalamka oo dhan, waxaa qaraxyo, duqeyn iyo gubitaan lala beegsaday iskuullada iyo jaamacadaha, halka carruurta, ardada, macallimiinta iyo aqoonyahannadana loo geystay dil, dhaawac, afduub iyo xarig aan loo meel dayin. Dhinacyada ku lugta leh colaadda ayaa xarumaha waxbarashada u adeegsaday saldhigyo ciidan ama xabsiyo. Falalkaasi ayaa khatar usoo jiida carruurta iyo ardada, gaar ahaan xuquuqda ay u leeyihiin waxbarashada, waxaana ay bulshada ka luminayaan asaaska ay ku dhisan karto mustaqbalkeeda. Dalal badan ayaa colaadaha waxa ay weli burburinayaan iskuullada iyo sidoo kale rajada iyo himilada jiil dhan oo carruur ah.

Weerarrada ka dhanka ah waxbarashada ayaa waxaa ka mid ah dhibaatooyinka loo geysto xarumaha tacliinta, ardada iyo shaqaalaha. Weerarrada ama hanjabaaddooda ayaa dhibaato ba'an oo muddo dheer qaadata ku reebi kara shakhsiyaadka iyo bulshada. Waxaa hakad geli kara helitaanka waxbarashada; waxaana la joojin karaa shaqada xarumaha waxbarashada ama waxaaba ka maqnaan kara ardada iyo shaqaalaha ee u baqaya ammaankooda. Weerarrada ka dhanka ah iskuullada iyo jaamacadaha ayaa loo adeegsaday in lagu muujiyo faquuq iyo dulqaad la'aan – si loo kordhiyo takoorka ku salaysan jinsiga, tusaale ahaan in gabdhaha laga joojiyo waxbarashada, colaad laga dhex abuuro beelaha qaar, la xaddido kala duwanaanta dhaqanka iyo in la diido xorriyadda waxbarashada iyo xaqa ku biiridda urur. Marka xarumaha waxbarashada loo adeegsado ujeedooyin ciidan, ayaa taasi waxa ay kordhin kartaa khatarta ah in dhinacyada dagaallamaya ay qortaan oo ay adeegsadaan carruurta, ama ay ka dhigaan kuwo u nugul tacaddiyada galmada ama in laga faa'iideysto. Si gaar ahna waxa ay sare ugu qaadi kartaa in weerar lala beegsado xarumaha waxbarashada.

Taa bedelkeeda, waxbarashada ayaa carruurta iyo dhalinyarada ka difaaci karta dhimashada, dhaawaca iyo in laga faa'iideysto; waxaana ay ka khafiifin kartaa saamaynta colaadda, ayadoo siinaysa xasillooni iyo helitaanka adeegyada kale ee muhiimka ah. Waxbarashada la jaanqaadi karta colaadda ayaa ah mid aan sii hurin balse qeyb ka qaadata nabada. Waxbarashada ayaa muhiim u ah hormarka iyo helitaanka xuquuqda aadanaha iyo xorriyadaha kale. Waxaan inta karaankeena ah ku dadaalaynaa sidii aan uga dhigi lahayn goobaha waxbarashada kuwo ammaan ah.

Waxaan soo dhaweynaynaa hindisayaasha dalalka ee lagu hormarinayo, laguna difaacayo xaqa waxbarashada iyo fududeynta in ay sii socoto xilliyada ay colaaddu jirto. Sii socoshada waxbarashada ayaa bulshada wajahaysa colaadda u sahli karta inay hesho macluumaad noolasheeda muhiim u ah, sida tan caafimaadka, iyo weliba talooyin ku aaddan khatarta kusoo foolka leh.

Waxaan bogaadineynaa hawsha uu Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ka qabtay carruurta iyo colaadaha, waxaana garawsannahay muhiimada uu leeyahay hannaanka dusha kala socoshada iyo ka warramida ee tacaddiyada waaweyn ee ka dhanka ah carruurta ku nool goobaha colaaddu ka jirto. Waxaan carrabka ku adkeyneynaa muhiimada ay leeyihiin qaraarrada Golaha Ammaanka ee tirsigoodu yahay 1998 (2011), iyo 2143 (2014) kuwaasoo ugu baaqayaa dhammaan dhinacyada ku lugta leh colaadda inay ka baaqsadaan falalka dhibaateyn kara in carruurta ay helaan waxbarasho, isla markaana ku dhiiragelinaya dalalka xubnaha ka ah inay qaadaan tallaabooyin wax ku ool ah oo looga hortagayo in ciidamada dowladda ama kuwa aan dowliga ahayn ay iskuullada u adeegsadaan si khilaafsan sharciga caalamiga ah.

Waxaan soo dhaweyneynaa diyaarinta *Tilmaamaha ka hortagga in ciidamada ay iskuullada iyo jaamacadaha adeegsadaan xilliyada dagaalladu socdaan*. Tilmaamahan ayaan sharci ahayn, isla markaana aan saamayneyn shuruucda caalamiga ah ee jira. Waxaa laga soo qaatay qaababka wanaagsan ee ay dalalka qaar ku dhaqmaan hadda, waxaana looga gol leeyahay in lagu yareeyo saamaynta ay colaadaha hubaysan ku reebi karaan waxbarashada. Waxaan soo dhaweyneynaa dadaallada lagu faafinayo tilmaamahan, isla markaana ay ku dhaqan gelinayaan ciidamada, xooggaga hubaysan ee dhinacyada kale ee ay khuseeyaan.

Anaga oo aqoonsan xaqa waxbarashada iyo dowrka ay tacliinta ka qaadan karto hormarinta isfahanka, dulqaadka iyo saaxiibtinnamada dalalka dhexdooda ah; ayna naga go'an tahay inaan xoojinno difaaca dadka rayidka ah ee ku nool deegaannada ay colaaddu ka jirto, gaar ahaan carruurta iyo dhalinyarada; isla markaana go'aansannay inaan

ka wada shaqeyno badqabka iskuullada, ayaa waxaan ansixineynaa *Tilmaamaha ka hortagga in ciidamada ay iskuullada iyo jaamacadaha adeegsadaan xilliyada dagaalladu socdaa*, waxaana:

- Adeegsaneynaa *Tilmaamaha*, waxaana sida ugu macquulsan, uguna haboon aan uga daraynaa siyaasadaha gudaha iyo nidaamka hawlgalka;
- Ku dadaalaynaa inaan si heer qaran ah u ururino macluumaadka muhiimka ah ee ku aaddan weerarrada ka dhanka ah xarumaha waxbarashada, anaga oo adeegsaneyna qaababka dusha kala socoshada iyo ka warramida ee jira; si aan u fududeyno ururinta macluumaadka; iyo in si aan kala sooc lahayn u caawinno dhibbanayaasha;
- Baaraynaa eedeymaha tacaddiyada ku xusan shuruucda qaran iyo kuwa caalamiga ah, ayadoo qaabka ugu haboon loo maxkamadeynayo dadka galay tacaddiyadaasi;
- Diyaarin doonnaa, hirgelin doonnaa isla markaana hormarin doonnaa nidaamka waxbarashada la jaanqaadi karta colaadda ee mashaariicda caalamiga ah ee bani'aadannimada iyo hormarinta, iyo kuwa heerka qaran;
- Ku dadaali doonnaa xaqiijinta sii socoshada waxbarashada ee xilliyada colaadda, taageeri doonnaa in dib loo furo xarumaha waxbarashada, haddii aan taa awood u leenahay, anaga oo fududeyneyna iskaashiga iyo kaalmada caalamiga ah ee mashaariicda ka hortagaya ama ka jawaabaya weerarrada ka dhanka ah waxbarashada, oo ay ka mid tahay inaan fulino bayaankan;
- Taageeraynaa dadaallada ay wadaan Golaha Ammaanka Qaramada Midoobay ee ku aaddan carruurta iyo colaadaha, Wakiilka Gaar ah ee Xoghayaha Guud u qaabilsan Carruurta iyo Colaadaha, hay'adaha kale ee Qaramada Midoobay iyo shirkadaha; iyo
- Yeelan doonnaa kulamo joogta ah, anaga oo ku marti qaadeyno hay'adaha caalamiga ah iyo bulshada rayidka ah, si aan dib-u-eegis ugu samayno fulinta bayaankan, iyo adeegsiga *Tilmaamaha*.





## LIFAAQYO

## *TILMAAMAHA KA HORTAGGA IN CIIDAMADA AY ISKUULLADA IYO JAAMACADAHA ADEEGSADAAN XILLIYADA AY DAGAALLADU SOCDAAN*

Waxaa loogu baaqayaa dhinacyada ku lugta leh colaadda in aanay ujeedooyin milateri u adeegsan iskuullada iyo jaamacadaha. Inkastoo la garawsan yahay in isticmaalka qaarkii aanu khilaafsaneyn sharciga colaadaha hubaysa, ayaa haddana dhammaan dhinacyada waxaa laga doonayaa inay ku dadaalaan sidii ay u xaqiijin lahaayeen ammaanka ardada iyo waxbarashada, ayaga oo raacaya tilmaamaha soo socda:

***Tilmaan 1:*** Looma oggola ciidamada dhinacyada dagaallamaya inay adeegsadaan iskuullada iyo jaamacadaha shaqeynaya ama ay ku taageeraan hawlgalkooda milateri.

(a) Qodobkan waxaa hoos imanaya iskuullada iyo jaamacadaha sida kumeelgaarka ah u xiran, kuwa saacadaha iyo maalmaha fasaxa ah ku jira, iyo kuwa galay fasaxa sanad dugsiyeedka,

(B) Dhinacyada isku haya colaadda ma adeegsan karaan awood ama sasabasho kale si ay maamulka waxbarashada ugu qanciyaan in xarumaha la xiro si loogu adeegsado dano milateri.

***Tilmaan 2:*** Looma oggola in dhinacyada ku lugta leh colaadda ay ujeedooyin milateri u adeegsadaan iskuullada iyo jaamacadaha u xirmay khatar uga timid dagaalka awgeed, marka laga reebo in xaaladda jirta ay sidaa ku kalifto, isla markaana aanay jirin wax bedel u noqon kara oo ay adeegsan karaan ciidankaasi. Waxaa xarumahaasi waxbarashada ee laga guuray la adeegsan karaa ilaa iyo inta laga helayo meel kale oo uga haboon adeegsiga milateri. Waa in mudnaanta la siiyaa dhismayaasha kale oo la adeegsadaa bedelkii ay ciidanka degi lahaayeen iskuullada iyo jaamacadaha, xataa haddii aanu qaabkooda wanaagsaneyn, waxaase reeban in la adeegsado dhismayaasha uu ilaaliyay Sharciga Caalamiga ah ee Bani'aadannimada (sida cisbitaallada), waana in maanka lagu hayo in dhinacyada ku lugta leh colaadda ay weerarrada ka ilaaliyaan hantida shacabka.

(a) Waa in waqtiga ugu kooban uu qaataa u adeegsiga ujeedooyinka milateri ee iskuullada iyo jaamacadaha laga guuray.

(b) Waa in xooggaga hubaysan ee qeybta ka ah colaadda, isla markaana adeegsanaya iskuullada iyo jaamacadaha laga guuray ay u oggalaadaan mas'uuliyiinta waxbarashada inay dib u furan xarumahaasi ka dib marka ay ka baxaan ciidanka, waa haddii aanay arintaasi khatar galineyn ammaanka ardada iyo shaqaalaha.

(c) Marka ay ciidanka ka guurayaan xarunta waxbarasho, waxaa looga baahan yahay inay dayactir buuxa ku sameeyaan burburka soo gaaray dhismayaasha, ayna xaqiijiyaan inay meesha ka saaraan dhammaan waxyaabaha muujinaya in goobta uu ciidan adeegsanayay. Gaar ahaan waa in goobta laga nadiifiyaa dhammaan hubka, rasaasta iyo walxaha aan weli qarxin.

***Tilmaan 3:*** Lama oggola in iskuullada iyo jaamacadaha loo burburiyo si aanay mustaqbalka u isticmaalin xooggaga dhinaca kale ee qeybta ka ah colaadda hubaysan. Xilli kasta, iskuullada iyo jaamacadaha waa hanti shacab, haddii ay ahaan lahaayeen kuwa ay waxbarashada ka socoto ama ku jira fasax gaaban ama mid dheer, ama laga guuray.

***Tilmaan 4:*** Inkastoo haddii dhinac ka mid ah xooggaga dagaallamaya uu iskuullada ama jaamacadaha u adeegsado ujeedooyin milateri ay ka dhigi karto, ayadoo la eegayo xaaladda, xarumo ciidan oo weerar lala beegsan karo, ayaa haddana dhinaca kale ee hubaysan waxaa looga baahan yahay inuu ka baaraandego qaabab kale ka hor inta aanu weerarrin xarumahaasi, sida in haddii xaaladu saamaxayso uu waqti hore usii digaa cadowgiisa inuu weerar kusoo wajahan yahay haddii aanu ka guurin xaruntaasi.

(a) Ka hor inta aanu dhinac ka mid ah xooggaga dagaallamaya weerarrin iskuulka, waxaa looga baahan yahay inuu tixgeliyo xaqiiqda ah in carruurta ay leeyihiin ixtiraam iyo ilaalin. Sidoo kale waa inuu tixgeliyaa saameynta xun ee mudada dheer ay bulshada ku yeelan karto helitaan la'aanta waxbarasho ee ka dhalata burburinta iskuullada.

(b) Ma aha in dhinac ka mid ah xooggaga dagaallamaya uu kusoo duulo iskuulka uuna ka qabsado dhinaca kale si uu danihiisa milateri ugu soo wato. Waa in sida ugu dhaqsaha badan meesha looga saaraa waxyaabaha muujinaya in goobta uu ciidan adeegsanayay, isla markaana lagu wareejiyaa mas'uuliyiinta rayidka ah si xarunta loogu adeegsado hawlaha waxbarashada.

***Tilmaan 5:*** Ma aha in askar ka tirsan dhinacyada ku lugta leh colaadda loo qorto inay sugaan ammaanka iskuullada iyo jaamacadaha, waa haddii ay jiraan dad kale oo hawshaas qaban kara. Haddii ay suuragal tahay, shacab si wanaagsan loo tababaray ayaa loo shaqaaleyn karaa sugidda ammaanka iskuullada iyo jaamacadaha. Haddii lagama maarmaan ay tahay, waxaa la tixgelin karaa in carruurta, ardada iyo shaqaalaha loo daadgureeyo meel ammaan ah.

(a) Haddii askar ka tirsan dhinacyada dagaallamaya ay ku hawlan yihiin sugidda ammaanka iskuullada iyo jaama-cadaha, waa in sida ugu macquulsan looga fogaadaa in ay ku sugnaadaan gudaha xarumahaasi, si aan loo soo weerarrin isla markaana aan loo carqaladeyn jawiga waxbarashada.

***Tilmaan 6:*** Waa in dhammaan dhinacyada ku lugta leh colaadaha hubaysan ay sida ugu macquulsan oo ugu haboon tilmaamahan ugu daraan dhaqanka ciidankooda, buugaagta milateri, shuruucda iska horimaadka, awaamirta hawlgalka, iyo qaababka kale ee lagu gudbin karo, si taliyayaasha ay ugu faafiyaan qaabka ugu wanaagsan. Waa in dhinacyada ku lugta leh colaadda ay go'aansadaan habka ugu wanaagsan ee ay sidaa ku samayn karaan.

**Sawirka Bogga Hore © Hedinn Halldorsson/Save the Children**

*Iskuulka hoose/dhexe ee St. Christof, magaaklada Bambari, 2015. Tan iyo markii ay bilowdeen isku dhacyada qowmiyadaha u dhexeeya sanadkii 2013, ayaa waxa uu boob iyo burbur ballaaran soo wajahay iskuullada Jamhuuriyadda Bartamaha Afrika, waxaana ay sidaa ku waayeen macallimiin, arday, xubnaha bulshada iyo qalabka wax lagu barto. Iyadoo kaashanaysa hay'adda EU Children of Peace, ayaa Save the Children waxa ay ka taageertaa iskuullada Jamhuuriyadda Bartamaha Afrika waxbarashada la jaan-qaadi karta colaadda oo lagu bixinayo jawi ammaan iyo badqab leh. Waxbarashada, gaar ahaan tan sida gaarka ah diiradda loogu saaro dhaqanka nabada ku salaysan, ayaa qeyb ka qaadata wax ka qabashada dagaallada iyo in carruurta ay adkeysi u yeeshaan kasoo kabashada saameynta colaadda.*

**Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada**
Xogheynta
350 5th Avenue, 34th Floor, New York, New York 10118-3299
Telefoonka: 1.212.377.9446
Emailka: GCPEA@protectingeducation.org

GCPEA

**www.protectingeducation.org**